
# Hordhaca Diiwaangelinta Koorsada Dugsiga Dhexe



Hagaha qorsheynta koorsada Dugsiyada Dadweynaha Seattle ee loogu talagalay ardayda dhigata dugsiga dhexe.

Seattle Public Schools

Dugsiyada Dadweynaha Seattle • 2445 3rd Ave S, Seattle, WA 98134 • 206-252-0000 • www.seattleschools.org

# Shaxda Mawduucyada


## Farriin ka socota Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Tacliinta 2

Meelaha Lagala Xiriirayo Dugsiga Dhexe iyo K-8 ........................ 3

## Muxuu Ku Saabsan Yahay Dugsiga Dhexe? 4

Koorsooyinka La Filayo ........................ 4

Shuruudaha Dugsiga Dhexe ee Muhiimka ah ........................ 4

Fikradaha Abaabulka ee Muhiimka ah ........................ 4

Talooyinka Shaqada Guriga ........................ 4

Shabakadaha Taageerada ........................ 5

Waxqabadyada iyo Naadiyada ........................ 5

Gelitaanka Darajooyinka ........................ 6

Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo ........................ 7

SchooLinks: Aalad Xirfadda Onlaynka iyo Qorshaynta Kulleejka ah ........................ 8

## Shuruudaha Qalin Jabinta 9

Fasalka Qalin Jabinaya 2027 & Fasalka 2028 ........................ 9

Tubaha Qalin Jabinta ee Fasalka 2027 & Fasalka 2028 ........................ 10

Hagista Kaqeybgalka Kiridhit Labaad ........................ 11

Koorsooyinka Dugsiga Dhexe ee loogu talagalay Kiridhitka Dugsiga Sare ........................ 11

Kiridhitka Aqoonta Luuqadaha Adduunka ........................ 11

Xulashada Koorsada Dugsiga Sare ee Onlaynka ah ........................ 11

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Qeexitaanada 11

Waxbarashada Xirfadda & Farsamada (CTE) ........................ 12

Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga ........................ 14

Xisaabta ........................ 16

Barashada Jimicsiga Jirka ........................ 18

Sayniska ........................ 20

Cilmiga Bulshada ........................ 22

Bandhiga Fanka & Farshaxanka ........................ 24

Luuqadaha Adduunka ........................ 27

# Farriin ka socota Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Tacliinta

Ardayga Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle,

Waxyaabaha soo socdo waa hordhac ku saabsan nidaamka diiwaangelinta koorsada dugsiga dhexe ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle ee sanad dugsiyeedka 2026-27. Waxaa loogu talagalay inay kaa caawiyaan sameynta go'aanno xog ogaal ah, oo waxbarasho oo aad ugu diyaargaroobeyso mustaqbalkaaga iyo inay dhammeystir u noqdaan macluumaadka aad ka hesho dugsigaaga dhexe.

Macalimiinteena iyo shaqaalaheena waxa ay ku dadaalaan inay ku siiyaan khibrad adag oo macno leh inta ay ku barayaan xirfadaha kuu diyaarin doona dugsiga sare. Tilmaanta ku jirta horudhacan waxay kuu sahlaysaa in aad u diyaargarowdo fasalada 6aad, 7aad, iyo 8aad.  Isticmaal hagahan inta aad isu diyaarineyso sannad dugsiyeedka xiga iyo wixii ka dambeeya.

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay rabaan in ardayda oo dhan ay qaataan oo ay guulo ka keenaan koorsooyinka guud ahaan dhinacyada maadada, oo ay ku jiraan Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga, Cilmiga Bulshada, Sayniska, Xisaabta, Bandhiga Fanka & Farshaxanka, Waxbarashada Jirdhiska, Waxbarashada Xirfadda & Firsamada, iyo Luuqadaha Adduunka.

Waxaanu rajeyneynaa in dukumiintigani kaa caawin doono bixinta hagida guud ee dugsiga dhexe ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle. Waxaa sidoo kale ku jira soo koobida koorsooyinka aad u baahan tahay in aad ku qaadato dugsiga sare sida shuruudaha qalin jabinta, Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeya, iyo taxanaha dhinaca casharada koorsada ee lagu taliyey.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan koorsooyinka uu bixiyo dugsigaaga, fadlan la xiriir macalin, lataliye, ama maamulaha jooga iskuulkaaga. Adiga ayey halkaan kuu joogaan. Inta aad isu diyaarineyso qorsho u sameynta sanadaha soo socda ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle, waxaanu kugu dhiirigelineynaa inaad tixgeliso waxyaabaha soo socda:

- **Sannad kasta waa muhiim!** U diyaargarowga kulleejka iyo xirfada shaqada waxa uu bilaabmaa goorta hore ee bilaabida dugsiga barbaarinta ubadka waxa uuna sii socdaa ilaa dugsiga sare iyadoo fasalka 6aad uu yahay sanad si gaar ah muhiim ugu ah.
- **Wax saadaali!** Saadaasha ugu wanaagsan ee guusha dugsiga sare waa dhammaystirka manhaj dugsiga dhexe ah oo adag.
- **Dejiso yoolalkaaga!** Qiimee waxa aad rabto inaad sameyso, kadib qor qorshe aad rabto inaad ku gaarto yoolkaas.
- **Waqtiga wax la bilaabo waa hadda!** Goor hore bilow si aad u go'aansato koorsooyinka sida ugu fiican kuugu diyaarin doona guusha dugsiga sare.
- **Xoog ku dhammee!** Qorshee inaad naftaada xujeyso inta lagu jiro sannadkaaga fasalka 8aad.
- **Soo bandhig waxa aad ka fikireyso oo aad qorsheyneyso!** Hannaankan kala hadal qoyskaaga oona la wadaag yoolalka barnaamijkaaga dugsiga sare. Xubnaha katirsan qoyskaaga waa shuraako muhiim u ah horumarinta Qorshahaaga Dugsiga Sare & Wixii Kadambeeyo.

Waxaanu kuu rajeyneynaa guul adiga oo ka faa'iideysanaya fursadaha ugu badan ee laga heli karo Dugsiyada Dadweynaha Seattle.

Si daacad ah,

Dr. Mike Starosky,
Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Tacliinta

# Meelaha Lagala Xiriirayo Dugsiga Dhexe iyo Dugsiga K-8

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan booqo www.seattleschools.org/schools/

## Dugsiyada Dhexe

### Dugsiga Dhexe ee Aki Kurose
3928 S Graham St.
Seattle, WA 98118
Xafiiska Guud: 206-252-7700

### Dugsiga Dhexe ee Denny International
2601 SW Kenyon St.
Seattle, WA 98126
Xafiiska Guud: 206-252-9000

### Dugsiga Dhexe ee Eckstein
3003 NE 75th St.
Seattle, WA 98115
Xafiiska Guud: 206-252-5010

### Dugsiga Dhexe ee Hamilton International
1610 N 41st St.
Seattle, WA 98103
Xafiiska Guud: 206-252-5810

### Dugsiga Dhexe ee Jane Addams
11051 34th Ave. NE
Seattle, WA 98125
Xafiiska Guud: 206-252-4500

### Dugsiga Dhexe ee Madison
3429 45th Ave. SW
Seattle, WA 98116
Xafiiska Guud: 206-252-9200

### Dugsiga Dhexe ee McClure
1915 1st Ave. W
Seattle, WA 98119
Xafiiska Guud: 206-252-1900

### Dugsiga Dhexe ee Meany
301 21st Ave. E
Seattle, WA 98112
Xafiiska Guud: 206-413-2100

### Dugsiga Dhexe ee Mercer International
7201 Beacon Ave S
Seattle, WA 98108
Xafiiska Guud: 206-252-8000

### Dugsiga Dhexe ee Robert Eagle Staff
1330 N 90th St.
Seattle, WA 98103
Xafiiska Guud: 206-413-2300

### Dugsiga Dhexe ee Washington
2101 S Jackson St.
Seattle, WA 98144
Xafiiska Guud: 206-252-2600

### Dugsiga Dhexe ee Whitman
9201 15th Ave. NW
Seattle, WA 98117
Xafiiska Guud: 206-252-1200

## Dugsiyada K-8

### Broadview-Thomson K-8
13052 Greenwood Ave. N
Seattle, WA 98133
Xafiiska Guud: 206-252-4080

### Cascade Parent Partnership
2919 1st Ave W
Seattle, WA 98119
Xafiiska Guud: 206-743-3900

### Catharine Blaine K-8
2550 34th Ave. W
Seattle, WA 98199
Xafiiska Guud: 206-252-1920

### Hazel Wolf K-8
11530 12th Ave. NE
Seattle, WA 98125
Xafiiska Guud: 206-252-4610

### Licton Springs K-8
3015 NW 68th St.
Seattle, WA 98117
Xafiiska Guud: 206-743-3700

### Louisa Boren STEM K-8
5950 Delridge Way SW
Seattle, WA 98106
Xafiiska Guud: 206-252-8450

### Orca K-8
5215 46th Ave. S
Seattle, WA 98118
Xafiiska Guud: 206-252-6900

### Pathfinder K-8
1901 SW Genesee St.
Seattle, WA 98106
Xafiiska Guud: 206-252-9710

### Salmon Bay K-8
1810 NW 65th St.
Seattle, WA 98117
Xafiiska Guud: 206-252-1720

### South Shore PK-8
4800 S Henderson St.
Seattle, WA 98118
Xafiiska Guud: 206-252-7600

### TOPS K-8
2500 Franklin Ave. E
Seattle, WA 98102
Xafiiska Guud: 206-252-3510

# Muxuu Ku Saabsan Yahay Dugsiga Dhexe?

Dugsiyada dhexe waa waqti aad haysato dookh badan, xornimo, iyo masuuliyad - oo dhammaan qeyb ka ah koritaanka. Liiskani waxa uu kaa caawin doonaa in aad fahamto qaar ka mid ah isbeddelada iyo dookhyada aad kula kulmi doonto dugsiga dhexe.

## Koorsooyinka La Filayo

### Inta lagu jiro waqtigooda dugsiga dhexe, ardayda waxay ku lug yeelan doonaan:

- 3 sano oo Faniga Luuqada ah oo lagu qaato fasalka 6aad, 7aad, iyo 8aad.
- 3 sano oo Cilmiga Bulshada ah oo lagu qaato fasalka 6aad, 7aad, iyo 8aad.
- 3 sano oo Xisaabta ah oo lagu qaato fasalka 6aad, 7aad, iyo 8aad.
- 3 sano oo Sayniska ah oo lagu qaato fasalka 6aad, 7aad, iyo 8aad.
- 1 sano oo Farshaxanka Muuqda ama Bandhigga ah oo sanad kasta lagu qaato fasalka 6aad, 7aad, iyo 8aad.
- 1 sano oo Barashada Jimicsiga Jirka ah oo lagu qaato fasalka 6aad, 7aad, iyo 8aad. Dugsiyada waxay ardayda uga cudurdaari karaan in ay kaqeybqaataan iyadoo loo cuskanayo naafo jireed, caqiido diimeed, ama kaqeybgalka ciyaaraha fudud sida ay farayaan tilmaamaha gobolka. Si kastaba ha noqotee, waxay weli ubaahan yihiin in ay xaqiijiyaan in ardayda ay fursad u helaan in ay bartaan cilmiga casharka garaadka ee Barashada Jimicsiga Jirka.
- Cutubyada barashada caafimaadka ee ku dhex jira xiisadaha Sayniska fasalka 6aad, 7aad, iyo 8aad.
- Qorshaha casharrada Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo.

## Shuruudaha Dugsiga Dhexe ee Muhiimka ah

### Maadada Ikhtiyaarka ah

Maadooyinka ikhtiyaarka ah sida farshaxanka, kooxda muusiga, kooxda heesta, baambayda, robotyada, tignoolajiyadda, iwm. Xulashooyinka ayaa ku kala duwan dugsiyada dhexe.

### Waraaqaha Natiijada

Warqadda natiijada waa diiwaan muujinaya diiwaanka koorsooyinka dugsiga sare ee ardayga iyo buundooyinka uu ka keenay. Arday waa in uu helaa ugu yaraan 0.5 kiridhit oo ah kiridhitka dugsiga sare si uu u helo warqad natiijo. Ardaydu waxay kiridhitka dugsiga sare ku qaadan karaan dugsiga dhexe.

## Fikradaha Abaabulka ee Muhiimka ah

Arday kasta waa uu ka duwan yahay midka kale marka ay timaado abaabulka.  Hoos ka eeg si aad uga hesho qaar ka mid ah talooyinka abaabulka si ay kaaga caawiyaan in aad si aad ah u guulaysato!

### Qorsheeyaha ama Kalandarka

Leyliyadaada kala soco qorsheeyahaaga ama kalandarkaaga si ay kaaga caawiyaan in ay shaqadaada si hagaagsan kuugu socoto. Xaqiiji in aad ku darto lambarada bogagga, waxyaabaha loo baahan yahay, iyo taariikhaha la iska rabo. Xusuusnow in xitaa haddii aadan haysan leyli gaar ah oo fasalka laga rabo, waa filasho inaad wax akhrido maalin kasta.

### Nidaamyada Abaabulka

Waxaad caadi ahaan lahaan doontaa lix xiisadood. Waxaanu kugula talinaynaa in aad qeyb u qoondayso fasal kasta, sida faylasha wax la gashado oo kala qeybsan, baqshadaha dhexda ka kala xiran, fooldharo, iwm.

Nidaamki kasta oo aad isticmaashaba:

- Dhammaan shaqada fasal kasta isugu gee qeybta ku habboon.
- Waxay noqon kartaa mid waxtar leh in aad leyliga guriga lagu sameeyo dhigto goob loogu talagalay markasta oo aad leyliga dhamayso si markaa aad si fudud u soo heli kartid marka ay tahay in aad geyso shaqada guriga.

## Talooyinka Shaqada Guriga

### Hel goob wax lagu akhristo

Isku day in aad hesho goob leh carqaladda ugu yar oo ka fog TV, taleefanka gacanta. La xiriir maktabad hayaha dugsigaaga si aad u hesho waqtiyo ku habboon in aad wax ku akhrisato maktabadda dugsiga.

### Caawimo waydiiso, haddii aad u baahato

Waxaad sidoo kale ka hubin kartaa macalinkaaga, la-taliyahaaga ama shaqaalaha kale si aad u aragto marka ay firaaqo hayaan si ay kuu siiyaan caawimo fasalka ka baxsan. Caawimo dheeraad ayaa laga yaabaa in la heli karo xilliga qadada ama saacadaha iskuulka kadib.

### Hel saaxiib wax kula akhristo

Haddii ay wax kugu istaagaan inta aad samaynayso shaqada laguu diray in aad guriga ku samayso waxaad la xiriiri kartaa saaxiibadaada la isku hallayn karo ee aaminka ah si ay kuu caawiyaan.

## Hawlaha waaweyn u kala qeybi tallaabooyin yaryar

Samee jadwal adigoo ka bilaabayo taariikhda la iska rabo hawsha oo gadaal-gadaal ugu laabanayo shaqada. Marka xigta, adigoo isticmaalayo qorsheeyahaaga, jadwal u samee qeyb kasta oo ka mid ah hawsha aad rabto in aad dhammaystirto. Haddii aad rabto in arrintan lagaa caawiyo, ka codso qof wayn ama macalinkaaga.

## Gee shaqada guriga

Haddii aad hilmaanto in aad geyso shaqada laguu diray in aad guriga ku samayso, buundadaada guud ayay si xun u saamayn doontaa.

- Shaqada guriga dhig goob si fudud looga soo heli karo.
- Soo bixi shaqada guriga isla marka aad soo gasho fasalka.
- Marka aad geyso shaqadaada guri, ka sax qorsheeyahaaga.

## Diyaarso habeenka ka horreeya

Boorsadaada cabbayso isla markiiba kadib marka aad dhammayso shaqadaada guri. Xaqiiji in aad haysato dhammaan leyliyadaada iyo agabkaaga lagaa rabo maalinta xigta. Boorsadaada dhabarka dhigo meel aad si fudud uga soo qaadan karto si aad ugu qaadato iskuulka.

# Shabakadaha Taageerada

## Waydiiso macalimiintaada

Haddii aad ku dhibtoonayso fasalka, caawimo hel isla markiiba! La xiriir macalinkaaga isla marka aad wax ku jahwareerto ama aadan hubin adigoo:

- kula xiriirayo iimayl
- Joogaya fasalka kadib si aad u codsato caawimo dheeraad ah.

**Xaqiiji in aad macalinkaaga u sheegto sida saxda ah waxa aad ku dhibtoonayso marka aad caawimo codsanayso.*

*Tusaale: "Xoogaa ma la iga caawin karaa xisaabta jajabyada? Waxaan ku wareersanahay marka la isku dhufanayo iyo marka la isku qeybinayo."*

## La hadal waalidiintaada ama mas'uuliyiintaada

La fadhiiso waalidkaaga ama qofka mas'uulka kaa ah oo daacad ka ahow waxa aad ku dhibtoonayso. Wada shaqeeya si aad u dejisaan qorshe.

## Codso in aad la hadasho la-taliyahaaga

La-taliyayaashu waxay jecel yihiin in ay caawiyaan ardayda. Kulan muddayso si aad uga wada hadashaan:

- Saaxiibtinimada ama arrimaha gaarka ah
- Rafaadka tacliinta
- Jadwal u samaynta su'aalaha
- Khilaad xallinta
- Xeeladaha la qabsiga
- Xirfadaha wax akhrinta
- Qorshaynta kulleejka iyo xirfadda

## U jeeso saaxiib

Saaxiibadu waxay noqon karaan kuwo si fiican kaaga caawiyo dhibaatooyinka maalinlaha ah, balse haddii dhibkaagu uu ku lug leeyahay walaacyo badbaadada ah, xaqiiji in aad isticmaasho shabakadaha taageerada dadka waaweyn. Xusuusnow in saaxiibada ay isbeddelaan marka dadku ay sii koraan waana ay badan tahay kooxda saaxiibadaada ah in ay sidoo kale isbeddesho muddo kadib.

## Adeegyada Taageerada Ardayga

Ardaydu waxay sidoo kale heli karaan adeegyo dheeraad ah haddii ay leeyihiin Qorshaha Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP), ay u baahan yihiin adeegyada luqadaha badan, ama adeegyada waxbarashada horumarsan. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyadaan, fadlan adeegso boggaga webseedyada soo socdo:

- Ardayda leh IEP-yada (Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah) - https://www.seattleschools.org/departments/special-education/
- Bartayaasha Luuqadaha Badan - https://www.seattleschools.org/departments/multilingual/
- Bartayaasha Horumarsan - https://www.seattleschools.org/departments/advanced-learning/

# Waxqabadyada iyo Naadiyada

Dugsiga dhexe, mid ka mid ah siyaabaha ugu wanaagsan ee loola kulmo saaxiibada cusub oo la isugu dayo waxyaabo kala duwan waa in lagu lug yeeshaa! Ka hubi dugsigaaga dhexe si aad u ogaato fursadaha laga heli karo.

## Naadiyada

Tusaalooyinka naadiyada dugsiga kadib waxaa ka mid ah: wargeyska dugsiga, buug-sannadeedka, naadiga farshaxanka, robotyada, naadiga xisaabta, naadiga ciyaarta, naadiga shaxda, naadiga sayniska, naadiga kala duwanaanta, naadiga riwaayadaha, GSA, kooxda jaasta, iwm. Ka hubi dugsigaaga dhexe ee mustaqbalka si aad u aragto waxay bixiyaan.
Ku biirista naadi waa hab wanaagsan oo lagula kulmo dad cusub.

## Kooxaha isku Danta ah

Dugsiyo dhexe oo badan ayaa bixiya kooxaha isku danta ah maalinti si ay ardayda u siiyaan fursad ay kula kulmaan kuwa kale ee ay isku danta ama asalka yihiin.

## Caawimada Shaqada Guri

Dugsiyo badan waxay leeyihiin naadi qaabilsan shaqada guriga ama waqtiga wax akhrisashada saacadaha dugsiga kadib. Tani waa qaab weyn oo caawimo looga helo macalimiinta, lagu isticmaalo kombiyuutarada ama kheyraadka dugsiga, oo wax lagala shaqeeyo ardayda samaynaysa leyliyada isku midka ah.

## Isboortiyada

Ardaydu waxay uqalmaan in ay kaqeybqaataan isboortiyada laga bilaabo fasalka 7aad, sida ay go'aamiso WIAA. Ardayda fasalka 6aad waxay ka tartami karaan isboortiga dugsiga dhexe. Si ay ugu qalmaan, ardaydu waa in ay joogteeyaan 2.0 GPA oo ay dhammaystiraan foomamka diiwaangelinta ee loo baahan yahay. Isboortiyada dugsiga dhexe ee hadda la bixiyo waa:

- **Dayrta:** Kubadda Gabdhaha, Ciyaarta Saxanka Ragga iyo Dumarka
- **Qaboobaha:** Kubadda Koleyga ee Wiilasha iyo Gabdhaha
- **Gu'ga:** Kubadda Laliska Gabdhaha, Baratanka Ragga iyo Dumarka, Kubadda Wiilasha

*Fiiro Gaar ah: Orodka baadiyaha iyo Legdinta lagama bixiyo heerka dugsiga dhexe.*

# Gelitaanka Darajooyinka

Dugsiga dhexe, waa ay fiican tahay in la yeesho caadada in darajooyinka laga hubiyo onlaynka ugu yaraan halmar toddobaadki. Tani waxaa ay kuu oggolaanaysaa in aad labo jeer hubiso in macalinka uu helay shaqada aad u gaysay oo aadna la socoto leyliyada. Waxay qaadan kartaa ku dhawaad labo toddobaad in leyliyada la aruuriyo, buundo la siiyo, oo lagu diiwaangeliyo onlaynka. Kala hadal macalinkaaga haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaacyo ah.

## Aaladda Source

Source waa aaladda wada-xiriirka ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle taasoo u oggolaata waalidiinta, mas'uuliyiinta iyo ardayda in ay galaan jadwallada, soo xaadiritaanka, dhibcaha imtixaanka, iyo qaar kaloo badan. Si aad u gasho, booqo https://ps.seattleschools.org/public/.

# Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo

Qorshaynta dugsiga sare iyo wixi ka dambeeyo waa hannaan ardayda lagu barayo rajada mustaqbalka. Rajadu waxay leedahay yool, iyadoo la arkayo dariiqa iyo wakaaladda si loo gaaro. Qorshaynta dugsiga sare iyo wixi ka dambeeyo waxay ardayda oo dhan u oggolaataa in ay:

- Ku lug yeeshaan waxqabadyada sahminta xirfadda shaqo si ay u kiciyaan fikradaha mustaqbalka,
- Milicsadaan oo ay xoojiyaan xirfadaha loo baahan yahay dugsiga sare iyo wixi ka dambeeyo
- Waa madasha loo adeegsado in lagu abuuro qorshe diiwaangelinaya halbeegyada loo baahan yahay in aad ku gaarto yoolalkaaga
- Dib loogu eego heerka fasal kasta si looga tarjumo xirfadaha la bartay iyo horumarinta xirfadaha
- Saxaan ama cusboonaysiiyaan marka fikrado ama khibrado cusub ay badalaan dariiqaaga
- Tilmaanta Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo, sida ugu wanaagsan, waxay isku dhaftaa horumarinta Dareenka Bulshonimo, Xirfadaha Qarniga 21aad, iyo isku xirka tacliinta.

Dhaqanka u diyaarsanaanta kulleejka iyo xirfada shaqada waxaa kamid ah is-fahmida, sahminta xirfada shaqada, horumarinta xirfadda, iyo qorsheynta xirfada shaqada.

## 1) Is-fahmida

Marka koowaad: ogow adiga naftaada, danahaaga, iyo awoodahaaga.

Aqoonta ka raadi bulshadaada iyo qoyskaaga, awoodahaaga wadajirka ah, iyo xigmadda la wadaago. Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo waxa uu adeegsadaa aalado waxyaabahaas waafajinaya xirfadaha shaqooyinka. Waxaa laga yaabaa inaad kahesho wax lama filaan ah.

## 2) Sahminta Xirfada Shaqada

Barashada iyo la kulanka shaqooyinka kala duwan waxa ay muhiim u tahay in la gaaro go'aanno xog ogaal ah. Sahminta waxa ay ku saabsan tahay aragtida danaha kala duwan, xirfadaha, iyo qiimayaal kujira xulashooyin badan.

Sidee danahaaga iyo xirfaddaadu ugu xiran yihiin xulashooyinka koorsadeena? Xirfado noocee ah ayey dadku u baahan yihiin in looga shaqaaleeyo shaqooyin kala duwan? Sidee ayaad ku aqoonsaneysaa tababarka loo baahan yahay si loo gaaro shaqooyinkaas?

## 3) Horumarinta Xirfadda

Dejinta Hadafka, xallinta dhibaatada, go'aan qaadashada, iyo adkeysiga ayaa ah tusaalooyinka xirfadaha looga baahan yahay fasalka, shaqada, iyo guusha nolosha. Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo waxa uu ka caawiyaa ardayda inay horumariyaan xirfadahaan. Ardaydu sidoo kale waxa ay bartaan xirfadaha risiyuumka codsiga shaqada iyo wax badan oo ka caawinaya iney guul ka gaaraan shaqada adduunka.

## 4) Qorsheynta Xirfada Shaqada

Waxaad horumarin doontaa aragtiyo waxaadna horumarin doontaa xirfado aad ku raadsato shaqooyinka, dhisida risiyuumka codsiga shaqada, qorsheynta kulleejka, qorsheynta kharashka kulleejka (kaalmada dhaqaale), ku habboonaanshaha kulleejka iyo xirfada shaqada, iyo kuwa kale oo badan.

U diyaarsanaanta kulleejka iyo xirfada shaqada waxa ay ku saabsan yihiin adeegsiga tacliinta, shucuurta bulshada, iyo xirfadaha shaqo ee nolosha iyo shaqada adduunka. Waxa aad sidoo kale wax kabaran doontaa caadooyinka shaqada, barashada adeegga, iyo kobaca shaqada.

U diyaar ahaanshaha kulleejka waa hal tallaabo oo loo qaaday hannaanka u diyaarsanaanta xirfada ee xirfadooyinka badan.

Qorshahaagu waa aalad ***iyo*** hannaan aad u isticmaaleysid inaad ku qeexdo yoolalkaaga xirfadaha shaqada iyo sameynta go'aano xog ogaal ah.

Hannaanku waxa uu kusaabsan yahay baarista danahaaga iyo awoodahaaga aad ku baareyso yoolalkaaga. Intaa kadib waxa aad dib u qiimeyn doontaa inta aad wax badan ka baraneyso naftaada iyo ikhtiyaarahaaga shaqo.

Tani waxa ay ku saabsan tahay taageerida adiga; qoyskaaga iyo odayaashaada; qeexida iyo kobcinta yoolalkaaga inta aad kusii jirto safarkaaga.

# SchooLinks: Aalad Xirfadda Onlaynka iyo Qorshaynta Kulleejka ah

Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo waxay u guurayaan Habka Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo ee cusub laga bilaabo dayrta 2026! SchooLinks waa madal taageerta qorsheynta xirfadda shaqada iyo kulleejka ee ardayda. SchooLinks waxay bixisaa hal meel oo ay ardaydu ka buuxiso kalana socoto qayb kasta oo ka mid ah HSBP. Ardayda waxay SchooLinks u adeegsan doonaan inay ku ogaadaan xiisahooda iyo waxa ay ku fiican yihiin, sahamiyaan kulleejyada iyo xirfadaha, oo ay abuuraan xirfad shakhsiyeed iyo qorshe tacliimeed oo sida ugu fiican uga tarjumaya yoolalkooda dhibloomada ka dib.

Si gacan looga gaysto hannaanka Qorsheyntooda Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo, ardaydeenna fasalka 6aad-12aad waxay isticmaalaan SchooLinks si ay isku qiimeeyaan, u sahmiyaan dariiqyada shaqada, u raadiyaan deeqo waxbarasho iyo fursado waxbarasho oo ku salaysan shaqada, iyo qaar kaloo badan.

## Sida ardayda ay u Galayaan SchooLinks

Ardayda waxay SchooLinks ka galaan madasha ardayga ee SPS Clever

Madasha ardayga iyo SchooLinks waxaa labadaba laga gali karaa iskuulka iyo guriga. Arday kasta waa in uu ogyahay magaca iyo lambar sireedka degmadooda si ay u galaan madasha ardayga. Ardayda waxay la xiriiri karaan macalin kasta ama maktabad hayaha si looga caawiyo magaca ay ku isticmaalaan iyo lambar sireedkooda. Wax badan ka ogow Madasha Ardayga ee Clever.

## Sida Waalidka/Mas'uulka Ku Galayo SchooLinks

Gelitaanka waalidka/mas'uulka waa un eegis kaliya iyo awoodda kulleejyada aad ugu darto liiska kulleejka mustaqbalka ee ardaygaaga.

U-dulmarka waalidka/dadka ardayda masuulka ka ah

Si aad u codsato koonto waalid, la xiriir Kooxda La-talinta Dugsiga oo ku dar magaca dugsiga iyo dugsiga uu dhiganayo.

**Fiiro Gaar ah:** Waa in aad leedahay koonto Source ah si aad u hesho koontada waalidka/mas'uulka ee SchooLinks. Haddii aadan hadda lahayn koonto Source ah, mid samayso adigoo raacaya tilmaamaha furashada.

Marka aad iska diiwaangeliso koontada SchooLinks, waa ay kuu furnaan doontaa ilaa inta ardaygaaga uu "doorto inuu ku jiro" SchooLinks oo uu ka diiwaangashan yahay degmada, oo aad leedahay koonto Source ah oo kuu furan, lagaagana aqoonsado nidaamka xogta ardayga in aad tahay waalid ama qof mas'uul ka ah ardayga. Si aad u codsato in lagaa caawiyo SchooLinks, fadlan la xiriir Kooxda La-talinta Dugsiga.

## Kheyraadka waalidiinta/mas'uuliyiinta:

- Gal koontada barta Source
  - Caawimaada koontada Source: sourcesupport@seattleschools.org
- Gal Madasha Ardayga ee Clever
- Sida loo furto koontada Source
- Sida Ardaydu SchooLinks uga Galayaan iskuulka iyo guriga

## Gelitaanka SchooLinks ee Ardayda Qalin-Jabisay

Ardayda waxay iimaylkooda shakhsi ahaaneed ku bixin doonaan waxqabadkooda SchooLinks ee sanadka u dambeeya. Ciwaanka iimaylkan ayay ku gali doonaan SchooLinks marki ardaydu ay qalin-jebiso.

## Caawimada SchooLinks Xilliga Kulaylaha

Haddii aad caawimo ubaahato xilliga kulaylaha, codsi taleefan lambar ku gudbi Let's Talk haddii ay suurtagal tahay, iyo sharraxaad kooban oo ku saabsan arrintaada ama su'aashaada. Waxaad sidoo kale farriin cod ah ku reebi kartaa 206-743-3600.

La xiriir Kooxda La-talinta adigoo adeegsanaya Let's Talk

# Shuruudaha Qalin Jabinta Dugsiga Sare

*Waayaha ardayda SPS ee dugsiyada dhexe waxay gacan ka gaysan doonaan qaabaynta qorshayaashooda dugsiga sare. Sidaa darteed, boggaga soo socdo waxay soo koobayaan shuruudaha qalin jabinta dugsiga sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle.*

Ardayda kujirta Fasalka 2021 iyo wixi kadambeeya waa iney helaan 24 dhibcood si ay u qalin jabiyaan. Shuruudaha qalin jabinta ee cusub waxaa waajibiyey Guddiga Waxbarashada ee Gobolka Washington. Gudigu waxa uu ugu talagalay shurduudaha cusub inay noqdaan labadaba kuwa adag oo dabacsan iyo in lagu taageero himilada nidaamka waxbarashada oo dhammaan ardayda u diyaarinaya kulleejka, xirfada shaqada, iyo nolosha.

## Fasalka Qalin Jabinaya 2027 & Fasalka 2028[a]

### Shuruudaha Koorsada ee 24-ka Kiridhit

**Af-Ingiriisiga:** 4 Kiridhit

- Hordhaca Suugaanta iyo Curiska 9, LGBTQIA Hordhaca Suugaanta iyo Curiska
- Suugaanta Adduunka iyo Curiska 10
- Suugaanta iyo Curiska Mareykanka 11, Daraasaadka Qowmiyaadka ama Suugaanta iyo Curiska LGBTQIA 11, Suugaanta iyo Curiska Afrikaanka, Eeshiyaanka, Laatiinka, ama Dhaladka ee Mareykanka 11, Luuqada iyo Curiska AP, Luuqada iyo Suugaanta IB 11, ama Af-Ingiriisiga Isla Bilaabida/Kulleejka ee Dugsiga Sare (CIHS) dhexdiisa ah.
- Isbarbardhigga Suugaanta iyo Curiska 12, Luuqada iyo Curiska AP ama Suugaanta iyo Curiska AP, Luuqada iyo Curiska IB ee loogu talagalay fasalka 12aad, ama Af-Ingiriisiga Isla Bilaabida/Kulleejka ee Dugsiga Sare (CIHS)

**Cilmiga Bulshada:** 3 Kiridhit

- Taariikhda Adduunka 1
- Taariikhda Adduunka 2, Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Adduunka 2, Taariikhda Adduunka AP: Casriga, ama Juqraafiga Aadanaha AP A
- Taariikhda Adduunka 3, Taariikhda Adduunka AP 2, ama Juqraafiga Aadanaha AP B, Daraasaadka Dadka Madow Taariikhda Adduunka 3, ama Taariikhda Adduunka LGBTQIA 3
- Taariikhda Mareykanka, Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Mareykanka, Taariikhda Ameerika IB, Taariikhda Mareykanka AP, Daraasaadka Qowmiyaadka Mareykanka CIHS 151, CIHS 147 iyo 148, Daraasaadka Dadka Madow Taariikhda Mareykanka, Taariikhda Mareykanka Filipinx, ama Taariikhda Mareykanka Latinx
- Dowladda iyo Rayidka Mareykanka, IB Qarniga 20aad, ama AP Dowladda Mareykanka iyo Siyaasadda
- Shuruudaha qalin jabinta Taariikhda Gobolka Washington, kiridhit lama bixiyo

**Xisaabta:** 3 Kiridhit

- Aljebra 1
- Joomitiri
- Aljebra 2, Xisaabta IB SL Sanadka 1, Aljebraha Dhaqaalaha, Xisaabta Ganacsiga 130, ama koorso aad u horumarsan oo isku xiga xisaabta ah ama koorsada xisaabta CTE ee la ansixiyay.

**Sayniska:** 3 Kiridhit

- Fiisikiska A/Kimistiriga A
- Baayolajiga A/Baayolajiga B
- Fiisikiska B/Kimistiriga B ama ka dooro koorsada la bixiyo ee aasaasiga ah ee la oggolaaday ama koorsooyinka u dhigma ee OSPI-ansixisay ee waxbarashada shaqada iyo farsamada (CTE).

**Career Connected Learning (Xirfadda Barashada Ku Xiran, CTE):** 1 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

**Caafimaadka:** 0.5 Kiridhit

- 0.5 Caafimaadka ama Caafimaadka Qoyska

**Barashada Jimicsiga Jirka:** 1.5 Kiridhit

- Ku Habboonaanshaha Shakhsi Ahaaneed
- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday

**Bandhiga Fanka iyo Farshaxanka:** 1 ilaa 2 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

**Koorsooyinka Diyaargarowga ee Shakhsi Ahaaneed** (Luuqadda Adduunka, Fanka, Sayniska, iwm.): 2 ilaa 3 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

**Ikhtiyaarada:** 4 Kiridhit

- Koorso kasta oo aan ka ahayn koorsooyinka kor lagu soo sheegay.

**Wadarta:** 24 Kiridhit

*[a] Fadlan la soco in shuruudaha qalin jabinta ee Fasalka 2028 wali la soo gabagabeynayo laakiin la filayo inay aad ugu ekaadaan kuwa Fasalka 2027. Macluumaadki iyo faahfaahinadi ugu dambeeyay ee ku saabsan shuruudaha qalin jabinta SPS, fadlan gal: https://www.seattleschools.org/departments/graduation-requirements/*

# Tubaha Qalin Jabinta ee Fasalka 2027 & Fasalka 2028[b]

Laga soo bilaabo Fasalka 2020, ardayda waxaa looga baahan yahay in ay dhammaystiraan dariiq diyaargarow ah oo waafaqsan Qorshahooda Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo si ay u qalin jabiyaan. Ardaydu waa inay dhammeystiraan ugu yaraan hal Qalin Jabin oo Diyaargarowga ah laakiin waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dhammaystiraan inta ugu badan ee la jaan qaadi kara shaqadooda iyo yoolalka waxbarasho.

## Diyaargarowga ELA

*Gaar ugu yaraan hal xulasho ELA ah oo ka mid ah xulashooyinka la taxay*

### Koorsooyinka ELA

- Koorsooyinka Ingiriisiga ee Running Start
- Koorsooyinka Ingiriisiga ee CIHS
- Af-Ingiriisiga Lagu Tagayo Kulleejka oo leh darajada D ama kabadan

*1.0 Kiridhit oo leh darajada C+ ama ka badan, ama leh dhibcaha imtixaan uqalmaya:*

- Luuqada iyo Curiska AP
- Suugaanta iyo Curiska AP
- Daraasaadka Afrikaanka Maraykanka AP
- Juqraafiga Aadanaha AP
- Dhaqaalaha AP
- Cilmi-nafsiga AP
- Taariikhda Maraykanka AP
- Taariikhda Adduunka AP
- Dowladda Mareykanka iyo Siyaasadda AP
- Isbarbardhigga Dowladda iyo Siyaasadda AP ama Shakhsiyaadka iyo Bulshada IB ama Koorsooyinka Luqadda/Suugaanta Af-Ingiriisiga IB oo leh darajada C+ ama ka badan (ama leh dhibcaha uqalmaya Imtixaanka AP/IB)

### Imtixaanaadka ELA:

- SBA ELA(2548)
- WA-AIM(104)
- SAT(410)
- ACT (14)

## Diyaargarowga Xisaabta

*Gaar ugu yaraan hal xulasho oo xisaabta ah oo ka mid ah xulashooyinka la taxay*

### Koorsooyinka Xisaabta

- Koorsada Isla Bilaabida xisaabta
- Koorsada xisaabta Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa
- 1.0 kiridhit Xisaabta Lagu Tagayo Kulleejka
- Istaatiitikada AP, Kombiyuutar Sayniska AP A, Mabaadii'da Kombiyuutar Sayniska AP, Kaakulaasta Hore AP, Kaalkulaas AP, koorsada Xisaabta IB, Sayniska Kombiyuutarka IB (darajada C+ ama ka sare teeram kasta)

### Imtixaanaadka Xisaabta:

- Xisaabta SBA (2595)
- WA-AIM (103)
- SAT (430)
- ACT (16)
- Istaatiitikada AP, Kombiyuutar Sayniska AP A, Mabaadii'da Kombiyuutar Sayniska AP, Kaakulaasta Hore AP, Kaalkulaas AP (3 ama ka sare)
- Koorsada Xisaabta IB (4 ama ka sare)
- Sayniska Kombiyuutarka IB

## Diyaargarowga Shaqada & Farsamada

*2.0 Kiridhit hal Aag oo ah Barnaamijka CTE*

- Culuumta Beeraha
- Ganacsiga iyo Suuqgeynta
- Cuno karinta iyo Soo dhaweynta
- Waxbarashada iyo Adeegyada Aadanaha
- Caafimaadka iyo Daawada
- Tignoolajiyadda Macluumaadka
- Fanka Warbaahinta
- Ganacsiga Xirfada Leh
- STEM

## U Diyaargarowga Xirfadaha Adeegga Ciidanka Xooga (ASVAB)

Qaado Xirfadaha Adeegga Ciidanka Xooga oo leh Darajada 31 ama ka badan

### Furaha:

- SBA = Imtixaanka Dheellitiran ee Smarter (imtixaanka dhamaadka-sanadka ee Xisaabta iyo Faniga Luqadda Af-Ingiriisiga ee uu u baahan yahay Gobolka Washington)
- WA-AIM = Helitaanka Washington ee Waxbaridda & Cabbiraadda (imtixaan kale oo ku saleysan heerarka guusha ee kale ee la waafajiyay Heerarka Gobolka Aasaasiga ee Guud oo loogu talagalay ardayda sida weyn naafada uga ah garaadka)
- SAT waagi hore u taagneyd "Imtixaanka Kartida Aqoonta" (imtixaanka heerka gelitaanka kulleejka oo cabiraya akhris-qoraalka ardayga, xisaabta, iyo xirfadaha wax qorista)
- AP = Meeleynta Sare
- IB = Dugsiga Caalamiga ah
- CIHS = Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa
- STEM = Sayniska, Tignoolajiyada, Injineerinka, Xisaabta

*[b] Fadlan la soco in shuruudaha qalin jabinta ee Fasalka 2028 wali la soo gabagabeynayo laakiin la filayo inay aad ugu ekaadaan kuwa Fasalka 2027. Macluumaadki iyo faahfaahinadi ugu dambeeyay ee ku saabsan shuruudaha qalin jabinta SPS, fadlan gal: https://www.seattleschools.org/departments/graduation-requirements/*

## Hagista Kaqeybgalka Kiridhit Labaad

Sharciga gobolka waxaa loo abuuray inuu xaqiijiyo helitaanka xog sax ah oo si fudud lagu fahmi karo oo ku saabsan barnaamijyada kiridhitka labaad ee ka bilaabanaya dugsiga dhexe. Tani waxaa loogu talagalay in ay si cad u qeexaan tafaasiisha barnaamijka iyo wixii kharash ama taageero ah ee la xiriira iyo faahfaahinada muhiimka ah ee la xiriira barnaamijyadaan. Qaar ka mid ah fursadaha la heli karo ee kiridhitka kulleejka ee lagu qaadanayo dugsiga sare ee ay ardaydu heli karaan marka ay gaaraan dugsiga waxaa ka mid ah Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa lagu sii dhigto, Isla Bilaabida, Meeleynta Horumarsan, Dugsiga Caalamiga ah, iyo Kiridhitka Labadaad ee CTE.

Ardayda dugsiga sare weli iskama diiwaangeliyaan barnaamijyadaan, balse waxay bilaabaan barashadooda si ay u taageeraan qorsheynta tacliinta ee mustaqbalka.

Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan barnaamijyada kiridhitka labaad iyo sida looga qeybqaato, fadlan u tixraac Hordhaca Diiwaangelinta Koorsada Dugsiga Sare.

## Koorsooyinka Dugsiga Dhexe ee loogu talagalay Kiridhitka Dugsiga Sare

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxa ay heli karaan kiridhitka dugsiga sare ee ah koorsooyinka dugsiga dhexe ee gaarka ah.

Fasalka qalain jabinaya 2024 iyo wixi ka dambeeyo, kiridhityada la helo inta ardaygu ku jiro fasalka toddobaad ama sideedaad waxaa lagu dari doonaa warqada natiijada dugsiga sare haddii aysan si kale u codsan ardayga iyo qoyska ardayga mooyee.

Ardayda ka qalin jabinaya fasalada kahor sanadka 2024, kiridhityada la helo inta ardaygu dhiganayey fasalka toddobaad ama sideedaad waxaa lagu dari doonaa warqada natiijada dugsiga sare marka ay codsadaan ardayga iyo qoyska ardayga.

Ardayda dhammeysay koorso kiridhit lagu qaadanayo oo dugsiga sare inta ay dhiganayeen dugsiga dhexe ee dugsi kale oo degmo waa inay keenaan warqada natiijada oo ka socota dugsiga degmada ee koorsada laga qaatay si loogu tixgeliyo oggolaanshaha maamulaha dugsiga sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle.

## Kiridhitka Aqoonta Luuqadaha Adduunka

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxaa lagu abaalmarin karaa kiridhitka luuqada adduunka iyaga oo ku dhisayo aqoonta luuqad aan Af-Ingiriisi ahayn. Qiimeyntu waxay la jaan qaadi doontaa Golaha Mareykanka ee tilmaamaha aqoonta Waxbaridda Luqadaha Dibadda (ACTFL) si loo hubiyo joogteynta luqadaha oo dhan.

Wixii macluumaad dheeraad ah, u tag lataliyaha iskuulkaaga ama bogga Qiimeynta Luqadaha Adduunka ka booqo [www.seattleschools.org/world-languages](www.seattleschools.org/world-languages)

## Xulashada Koorsada Dugsiga Sare ee Onlaynka ah

Waxaa jira afar ikhtiyaar si ay ardayda u qaataan koorsooyinka onlaynka ah:

1. Iska Diiwaangeli Ikhtiyaarka Onlaynka ee Iskaashiga Waalidka Cascade.
2. Iska Diiwaangeli Akadeemiyada Intergency iyo qaadashada koorsooyinka onlaynka ah.
3. Qaado koorsooyinka onlaynka ah ee dib u kabista kiridhitka adiga oo u mataya bixiiyeyaasha dugsigaaga sare uu isticmaalayo.
4. Raac Siyaasada iyo Habraaca 2024 oo codso ikhtiyaarka qaadashada kiridhitka ka baxsan degmada.

Helitaanka koorsooyinka onlaynka ah waa ay kala duwanaan kartaa iyadoo ay ku salaysan tahay heerka fasalka, ujeedada (dardargelinta iyo buundo kabashada), iyo oggolaanshaha dugsiga. Qoysasku waa inay la tashadaan la-taliyaha dugsigooda kahor inta aanay iska diiwaangelin.

## Isku Xigitaanka Casharada Koorsada ee Lagu Taliyey

Bogagga soo socdo waxa ay ka kooban yihiin isku xigxiga koorsada lagu taliyay iyo xulashooyinka koorsada qaarkood, diyaargarowga, ama tusaalooyinka laga heli karo aag kasta oo tacliinta ah oo loo baahan yahay.

Fadlan kala xiriir iskuulkaaga wixi su'aala oo ku saabsan qeexitaanada koorsooyinka lasoo qoray iyo inaad ogaato xulashooyinka gaarka ah ee uu dugsigaaga dhexe bixiyo. Macluumaad muhiim ah oo dheeraad ah waxaa laga heli karaa agabka diiwaangelinta ee uu iskuul kasto soo saaro.

Si wadajir ah loo isticmaalo, tani waxa ay kaa caawin doontaa inaad nakhshadeyso qorshe waxbarasho oo buuxin doona shuruudaha qalin jabinta oo kaa caawin doona inuu kuu diyaariyo qorshayaashaada dugsiga sare ka dib ah. Qorshahani waxaa loola jeedaa in lagu bixiyo waayo-aragnimo waxbarasho oo macno leh, ku habboon, oo shakhsi ahaaneed ee dugsiga sare oo dhan.

# Waxbarashada Xirfadda & Farsamada (CTE)*

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Diyaargarowga Fasalada 6-12

### 9 Diyaargarow oo CTE ah:

1. Culuumta Beeraha
2. Ganacsiga iyo Suuqgeynta
3. Cuno karinta iyo Soo dhaweynta
4. Waxbarashada iyo Adeegyada Aadanaha
5. Caafimaadka iyo Daawada
6. Tignoolajiyadda Macluumaadka
7. Fanka Warbaahinta
8. Ganacsiga Xirfada Leh
9. STEM

**FASALKA 7aad:** CTE (hal simistar)

**FASALKA 8aad:** CTE (hal simistar)

**FASALKA 9aad:** Koorso Hordhac ah ama Heer Horumarsan ee Diyaargarowga Xirfada Shaqada iyo/ama Koorsada Xirfada Ku Xiran. Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha Seattle ayaa la heli karaa. (Dhammaan koorsooyinku waa kuwo ikhtiyaar ah marki 1 kiridhit la helo)

**FASALKA 10aad:** Koorso Hordhac ah ama Heer Horumarsan ee Diyaargarowga Xirfada Shaqada iyo/ama Koorsada Xirfada Ku Xiran. Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha Seattle ayaa la heli karaa. (Dhammaan koorsooyinku waa kuwo ikhtiyaar ah marki 1 kiridhit la helo)

**FASALKA 11aad:** Koorso Hordhac ah ama Heer Horumarsan ee Diyaargarowga Xirfada Shaqada iyo/ama Koorsada Xirfada Ku Xiran. Goobta Shaqa Barashada iyo Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha Seattle ayaa la heli karaa. (Dhammaan koorsooyinku waa kuwo ikhtiyaar ah marki 1 kiridhit la helo)

**FASALKA 12aad:** Koorso Hordhac ah ama Heer Horumarsan ee Diyaargarowga Xirfada Shaqada iyo/ama Koorsada Xirfada Ku Xiran. Goobta Shaqa Barashada iyo Koorsooyinka Xarunta Xirfadaha Seattle ayaa la heli karaa. (Dhammaan koorsooyinku waa kuwo ikhtiyaar ah marki 1 kiridhit la helo).

*Dugsiyada dhexe ee SPS waxay caadi ahaan koorsooyinkaan u bixiyaan doorasho ahaan oo macnaheedu tahay in ardayda aanay qasab ku ahayn in ay fasaladaan ku qaataan dugsiyada dhexe.

# Waxbarashada Xirfadda & Farsamada (CTE)

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga.*

## Otomaatiga & Robotyada

**Koodhadhka Koorsada:** MPC4203

**Fasalada:** 7-8

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadan dhexdeeda, ardayda waxay raadraacaan taariikhda, horumarinta, iyo saamaynta otomaatiga iyo robotyada. Waxay wax ka bartaan nidaamyada makaanigga, wareejinta tamarta, otomaatiga mashiinka iyo nidaamyada koontaroolka kombiyuutarka. Ardaydu waxay helaan aqoonta iyo xirfadaha xagga mashaakil-xallinta, wada-shaqeynta kooxeed iyo hal-abuurka. Ardayda waxay wax ka baran doonaan saameynta togan iyo taban ee otomaatiga iyo robotyada ay ku leeyihiin aadanaha xagga badbaadada iyo dhaqaalaha, baari doonaan xirfadaha la xiriira, go'aamin doonaan shuruudaha shaqooyinka robotyada mustaqbalka. Ardaydu waxay awoodi doonaan in ay sharraxaan sida injineerada ay gacan uga gaystaan hindisidda iyo casriyaynta badeecadaha waxayna qeexi doonaan saamaynta tignoolajiyada ay ku yeelatay bulshada.

## Naqshadeynta & Qaabaynta

**Koodhadhka Koorsada:** MPC4202

**Fasalada:** 7-8

**Muddada:** Labo simistar

Koorsadani waxay isticmaashaa softiweerka qaabaynta 3D oo qeyb ka ah hannaanka naqshadeynta. Iyagoo ka faa'iidaysanayo habka naqshadeynta, ardaydu waxay fahmaan sida naqshadeyntu u saameyso noloshooda iyagoo baranaya farsamooyinka gacan wax ku sawiridda iyo isticmaalka joomatari sharrax ah oo qayb ka ah naqshadeynta, cabbirka, iyo qaabaynta kombiyuutarka. Ardaydu waxay afeeyaan maskaxda, baaraan, horumariyaan fikrado, abuuraan moodhallo, tijaabiyaan, oo ay qiimeeyaan fikradaha naqshadda waxayna gudbiyaan xalal.

## HAL-ABUURKA STEAM LAABKA A & B

**Koodhka Koorsada:** MPC451

**Fasalada:** 7-8

**Muddada:** Labo simistar

Koorsada Laabka Hal-abuurka STEAM, waxaad isu keeni doontaa sayniska, tignoolajiyada, injineernimada, farshaxanka, iyo xisaabta si aad u xalliso mashaakilaadka dhabta ah ee aduunka iyada oo loo marayo xujooyinka naqshadaynta iyo habka hal-abuurka. Waxaad sahmin doontaa waxyaabaha sida nakhshadaynta 2D iyo 3D iyo daabacaada, suuraynta, tafatirista fiidiyowga iyo filimka, sawir qaadista, koodhgaraynta, robotyada, fiilooyinka korontada, iyo nakhshadda geemamka. Waxaad baran doontaa sida tignoolajiyadaha dhijitaalka ee hadda jira iyo kuwa soo baxayo loogu isticmaalo in lagu soo bandhigo farshaxanka iyadoo isla markaana lala shaqaynayo dadka kale si loo maareeyo isticmaalka badbaadada iyo saxda ah ee agabka, aaladaha, iyo qalabka STEAM.

# Af-Ingiriisiga Faniga Luuqada

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12

**FASALKA 6aad**
Faniga Luuqada 6

**FASALKA 7aad**
Faniga Luuqada 7

**FASALKA 8aad**
Faniga Luuqada 8

**FASALKA 9aad**
LGBTQIA Horudhaca Suugaanta iyo Curiska 9

**FASALKA 10aad**
Suugaanta Adduunka iyo Curiska

**FASALKA 11aad**
Daraasaadka Qowmiyaadka, Afrikaanka Maraykanka, Aasiyaanka Maraykanka, Laatiinka Maraykanka, Dhaladka Maraykanka -ama- LGBTQIA Maraykanka ee Suugaanta & Curiska 11

**FASALKA 12aad**
Isbarbardhigga Suugaanta iyo Curiska 12 -ama- Suugaanta & Curiska AP ee fasalka 12aad -ama- Luuqada iyo Curiska AP, Luuqada iyo Suugaanta IB ee fasalka 12aad -ama- Af-Ingiriisiga Isla Bilaabida/Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa

# Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga.*

## Faniga Luuqada 6A iyo 6B

**Koodhadhka Koorsada:** MLA0007 6A, MLA4037 6B

**Fasalada**: 6

**Muddada:** Labo simistar

Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga 6A iyo 6B waa koorso aasaasi ah oo loogu talagalay ardayda dugsiga dhexe, iyadoo xoogga saarayso xirfadaha akhriska dhow, qorista rasmiga ah, iyo xirfadaha hadalka. Waxay diiradda saartaa falanqaynta iyo cilmi-baarista suugaanta, iyadoo si tartiib-tartiib ah usii adkaanayso. Ardaydu waxay bartaan in ay akhriyaan qoraallo kala duwan iyagoo adeegsanaya xeeladaha fahamka waxayna falanqeeyaan waxyaabaha sida fikradda ugu weyn, mowduuca, iyo farsamada qoraaga. Koorsada waxay xoojisaa aqoonta wax qorista ee noocyada kala duwan, iyada oo xoogga saaraysa qoraallada ah sheekada, dooda, iyo xogta iyadoo isla markaana raacayso heshiisyada naxwaha. Ardaydu waxay sidoo kale horumariyaan xirfadaha cilmi-baarista, iyagoo si ku habboon u xusaya ilaha oona ka fogaanaya in ay waxaysan lahayn ka dhigaan wax ay iyagu leeyihiin. Intaa waxaa dheer, waxay ku lug yeeshaan doodaha iyo bandhigyada, iyagoo kor u qaadaya xirfadaha hadalka iyo dhagaysiga, iyagoo sidaa darteedna kobcinaya hab fikirka qotoda dheer iyo wada-xiriirka wax ku oolka ah.

## Faniga Luuqada 7A iyo 7B

**Koodhadhka Koorsada:** MLA0017 7A, MLA4157 7B

**Fasalada**: 7

**Muddada:** Labo simistar

Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga 7A iyo 7B waa koorso sanad dhan ah oo loogu talagalay in lagu xoojiyo xirfadaha wax akhrinta, hadalka, dhagaysiga, iyo hab fikirka qotoda dheer ee ardayda iyada oo loo marayo qoraallo heer fasal ah oo kala duwan. Waxay xoojisaa falanqaynta suugaanta iyo fahamka sida qeybaha kala duwani ay u falgalaan si ay u saameeyaan macnaha. Ardaydu waxay si wadajir ah u akhrin doonaan noocyo kala duwan waxayna horumarin doonaan xirfadaha wax akhrinta dhow iyo wax qorista, iyagoo diiradda saaraya fasiixsanaanta iyo dhagaystayaasha. Waxay samayn doonaan cilmi-baaris, xusi dooaan caddaynta, waxayna dhisi doonaan oraallo xogeed iyo kuwo sheeko leh iyagoo isticmaalaya hannaanka wax qorista. Inta koorsadu sii socoto, qoraaladu way sii kordhi doonaan xagga adkaanta iyo kakanaanta, iyadoo diirada la saarayo iskaashiga, weydiinta, iyo xoojinta xirfadaha luuqadda iyo wada-xiriirka.

## Faniga Luuqada 8A iyo 8B

**Koodhadhka Koorsada:** MLA0018 8A, MLA 4158 8B


**Fasalada**: 8

**Muddada:** Labo simistar

Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga 8A iyo 8B waa koorso sanad dhan ah oo loogu talagalay in lagu dhiso aasaas adag oo ah xagga akhriska, wax qorista, luqadda, ku hadalka, iyo xirfadaha dhageysiga lagama maarmaanka u ah dugsiga sare iyo wixii ka dambeeyo. Manhajka waxaa ka mid ah buugaag kala duwan oo loogu talagalay falanqaynta suugaanta, iyagoo ardayda ka caawinayo in ay qiimeeyaan kuwa qiyaaliga ah iyo kuwa aan qiyaaliga ahayn iyagoo diiradda saaraya xulashooyinka qorayaasha. Ardaydu waxay xoojiyaan aqoontooda wax qorista iyagoo adeegsanayo doodo iyo qeybo xogeed, iyagoo adeegsanayo sheegashooyin iyo cadaymo adag. Waxay sidoo kale farsameeyaan sheekooyinka sahminaya khibradaha aadanaha. Iyadoo hawluhu sii kakanaanayaan, ardaydu waxay horumariyaan awoodo hadal iyo dhagaysi wax ku ool ah oo loogu talagalay bandhigyada iyo doodaha, oo u diyaarinaya inay si wada jir ah oo madax-bannaan wax uga qabtaan qoraallada horumarsan ee dugsiga sare.

# Xisaabta

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12



# Xisaabta

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga.*

## Xisaabta 6

**Koodhadhka Koorsada:** MMA6858, MMA6860

**Fasalada**: 6

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxay dib-u-eegi doonaan xisaab-fallada jajabka iyo jajab tobanlaha waxayna u adeegsan doonaan in ay ku xalliyaan mas'alooyinka. Waxay baran doonaan qeybta dheer, jajabyo u qeybin doonaan jajabyo, waxayna sii ballaarin doonaan fahamkooda tirada lakab taban iyo abyoonayaasha. Ardaydu waxay sababayn doonaan qiimaha sugan, kala horraynta tirada lakab, waxayna baraha ku meeleyn doonaan dhammaan afar geesaleyda salax kulan. Waxay adeegsan doonaan doorsoomayaasha, qori doonaan tibaaxyada iyo isla'egyada, qiimeyn doonaan, oo ay xallin doonaan isla'egyada iyo ismala'egyada. Ardayda waxay falanqayn doonaan saamiyada, qiimayaasha halbeegga, iyo xiriirada saamigalka. Waxay sahmin doonaan su'aalaha istaatiitikada, soo koobi doonaan xogta, oo ay xisaabin doonaan cabbirada sida celceliska, dhexeeyaha, iyo kala duwanaanta. Ardayda waxay xisaabin doonaan bedadka, bedadka dhulka, mugaga, waxayna sawiri doonaan geesoolayaasha.

## Xisaabta 7

**Koodhadhka Koorsada:** MMA6862, MMA6864

**Fasalada**: 7

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxay fahmi doonaan nidaamka lambarka lakab waxayna u aqoonsan doonaan jajabyada, jajab tobanlayaasha, iyo boqollayda sidi tiro lakab. Waxay ku shaqayn doonaan tirada lakab waxayna xirfadahaan ku dabaqi doonaan tibaaxyada tiro iyo aljebro. Ardaydu waxay xallin doonaan mas'alooyinka saamiga iyo saamigalka halka tallaabo ah iyo kuwa tallaabooyinka badan, garaaf ku sawiri doonaan xiriirada saamigalka, oo ay fahmi doonaan tiirada. Waxay wax ka qaban doonaan mas'alooyinka boqolleyda, oo ay ku jiraan qiimo dhimisyada iyo canshuuraha, waxayna xallin doonaan mas'alooyinka sawirista iskeelka. Ardayda waxay qori doonaan oo ay xallin doonaan isla'egyada iyo ismala'egyada.  Waxay ka shaqayn doonaan goobooyinka iyo sawirada saddex geesoolayaasha ah, waxayna xallin doonaan mas'alooyinka ku lug leh bedka, bedka dhulka, iyo mugga. Waxay isu barbardhigi doonaan qeybinta xogta, sahmin doonaan muunad samaynta, oo ay qiimeyn doonaan noocyada ixtimaalka.

## Xisaabta 7 iyo 8 La Iskudhafay

**Koodhadhka Koorsada:** MMA3821, MMA3822

**Fasalada**: 7

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxay fahmi doonaan nidaamka lambarka lakab, iyagoo u aqoonsanayo jajabyada, jajab tobanlayaasha, iyo boqollayda sidi tiro lakab. Waxay ku shaqayn doonaan tirada lakab, sharrixi doonaan xeerarka aritmatig taban, waxayna xallin doonaan isla'egyada ku lug leh tirada lakab. Ardayda waxay sahmin doonaan tirooyinka lakab iyo tirooyinka lakabka la', asto xidid tiro, iyo jibbaarada abyoone. Waxay xallin doonaan saamiga, saamigalka, iyo mas'alooyinka boqolleyda, garaaf ku sawiri doonaan xiriirada saamigalka, waxayna tarjumi doonaan tiirooyinka iyo tikraarada y. Ardayda waxay isu barbardhigi doonaan qeybinta xogta, isticmaali doonaan muunad samaynta bakhtiyo-nasiibka ah, oo ay qiimeyn doonaan noocyada ixtimaalka. Waxay dabaqi doonaan Aragtida Baysogras, xallin doonaan mas'alooyinka bedka dhulka iyo mugga ee toobinada, dhululubooyinka, iyo kubadaha, waxayna falanqayn doonaan sawirada labo-geeslaha ah iyagoo adeegsanaya doorsoon, sargo'naan, iyo isu ekaansho.

## Xisaabta 8

**Koodhadhka Koorsada:** MMA6866, MMA6867

**Fasalada**: 8

**Muddada:** Labo simistar

Ardaydu waxay ballaarin doonaan fahamkooda nidaamka tirada maangalka ah, oo ay ku jiraan tirooyinka lakabka iyo tirooyinka lakabka la', asto xidid tiro, iyo jibbaarada abyoone. Waxay xallin doonaan isla'egyada toosan, tarjumi doonaan tiirooyinka iyo tikraaraha y, waxayna falanqayn doonaan xiriirada saamigalka. Ardaydu waxay fansaarada u fahmi doonaan sidi xeerar isku xiraya gelinada iyo wax soosaarada, u kala tarjumi doonaan matalayaasha fansaar, waxayna qeexi doonaan xiriiradooda. Waxay xallin doonaan nidaamyada isla'egyada toosan waxayna kuwaan u isticmaali doonaan in ay ku falanqeeyaan mas'alooyinka. Ardaydu waxay baran doonaan Aragtida Baysogras iyo adeegsiyadeeda, waxay xallin doonaan mas'alooyinka mugga ee toobinada, dhululubooyinka, iyo kubadaha, waxayna sahmin doonaan doorsoon, sargo'naan, iyo isu ekaansho. Waxay falanqayn doonaan xiriirada xaglaha, saddexaglaha, iyo xariiqyada barbarraha ah.

*Wixi macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruuda uqalmitaanka, fadlan raac liinkiga https://www.seattleschools.org/departments/advanced-learning/identification-and-eligibility/*

# Barashada Jimicsiga Jirka

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12

**FASALKA 6aad – FASALKA 7aad – FASALKA 8aad**

Hal simistar oo ah barashada jimicsiga jirka fasalkiiba

**FASALKA 9aad**

### Xulashada 1

KU Habboonaanshaha Shakhsi Ahaaneed (0.5 kiridhit)

- Koorso aasaasi ah
- Waxaa kormeera Khabiirka Barashada Jimicsiga Jirka oo shahaadeysan

Koorsada SPS PE (0.5 Kiridhit)

- Isboortiga Kooxda 1
- Isboortiga Kooxda 2
- Nashaadaadka Wakhtiga Nolosha 1
- Nashaadaadka Wakhtiga Nolosha 2
- Isboortiga Shakhsi/Labaad 1
- Isboortiga Shakhsi/Labaad 2
- Tababarka/Shuruudeynta Miisaanka 1
- Tababarka/Shuruudeynta Miisaanka 2
- Dabaasha 1
- Dabaasha 2
- Laxamada/Qoob Ka Ciyaarka 1
- Laxamada/Qoob Ka Ciyaarka 2

Koorsada SPS PE (0.5 Kiridhit)

(Xulashada koorsada - qeybta kore ka eeg)

### Xulashada 2

KU Habboonaanshaha Shakhsi Ahaaneed (0.5 kiridhit)

- Koorso aasaasi ah
- Waxaa kormeera Khabiirka Barashada Jimicsiga Jirka oo shahaadeysan

Barashada Dhijitaalka (0.5 kiridhit)

- Dukumiintiyeynta 80 saacadood oo Nashaadka Jirka ah
- Waxaa kormeera shaqaale shahaadeysan

Barashada Dhijitaalka (0.5 kiridhit)

- Dukumiintiyeynta 80 saacadood oo Nashaadka Jirka ah
- Waxaa kormeera shaqaale shahaadeysan

**FASALKA 10aad**

**FASALKA 11aad**

**FASALKA 12aad**

# Barashada Jimicsiga Jirka

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyinka lagu taliyey ee ka socda baaxadda iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga.*

## Fiirooyin Gaar ah:

Ardaydu waa in ay qaataan 1 simistar oo Barashada Jimicsiga Jirka ah oo lagu qaato fasalka 6aad, 7aad, iyo 8aad. Ardaydu waa inay qaadataa 0.5 Jirdhiska Shakhsiyeed marka ugu horraysa khibradooda dugsiga sare sida ay isugu xigaan Koorsada Barashada Jimicsiga Jirka ee aasaasiga ah. Dugsiyada waxay ardayda uga cudurdaari karaan in ay kaqeybqaataan iyadoo loo cuskanayo naafo jireed, caqiido diimeed, ama kaqeybgalka ciyaaraha fudud sida ay farayaan tilmaamaha gobolka. Si kastaba ha noqotee, waxay weli ubaahan yihiin in ay xaqiijiyaan in ardayda ay fursad u helaan in ay bartaan cilmiga casharka garaadka ee u baahan in la barto, la bixiyo oo lagu qiimeeyo Barashada Jimicsiga Jirka.

# Sayniska

## Isku Xiga Koorsada Lagu Taliyey ee Fasalada 6-12

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga.*

| Fasalka | Koorsada |
|---|---|
| FASALKA 6aad | Sayniska 6 |
| FASALKA 7aad | Sayniska 7 |
| FASALKA 8aad | Sayniska 8 |
| FASALKA 9aad | Fiisikiska A iyo Kimistiriga A |
| FASALKA 10aad | Baayolajiga A iyo Baayolajiga B |
| FASALKA 11aad | Kimistiriga B iyo Fiisikiska B |
| FASALKA 12aad | Koorsadi kasta oo Saynis ah oo la oggolaaday (waa ikhtiyaari) |

### Fiirooyin Gaar ah:

**Kimistiriga B iyo Fiisikiska B ayaa si weyn loogu talinayaa dhowr sababood oo muhiim ah dartood:**

- Aasaas Saynis Adag: Koorsooyinkani waxay bixiyaan cilmiga aasaasiga ah ee kimistiriga iyo fiisikiska labadaba, iyagoo ardayda u diyaariya dariiqyo kala duwan oo ballaaran oo kulleejka iyo shaqada ah.
- Waxay Buuxisaa Shuruudaha Gelitaanka Kulleejka: Shuruudaha Qeybinta Tacliimeed ee Gobolka Washington (CADR-yaada) waxay ubaahan yihiin hal kiridhit saynis oo ah bayooloji, kimistiri, ama fiisikis. Qaar badan oo ka mid ah kulleejyada 4-ta sano ah waxay sidoo kale ubaahan yihiin sanad buuxa oo kimistiri ah (iyo mararka qaar fiisikis) si la isaga qoro. Kimistiriga A+ iyo Kimistiriga B waxa uu qanciyaa sanadka buuxa ee kimistiriga, halka Fiisikiska A + Fiisikiska B uu buuxiyo sanad buuxa oo fiisikis ah.

**Kiridhitka saddexaad ayaa laga yaabaa in lagu doorto daneynta ardayga waxaana ku jiri kara koorso CTE oo saynis u dhiganto.**

Fadlan Dugsigaaga Sare ka eeg AP, IB, Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa ah, Sayniska CTE u dhigma, iyo xulashooyinka kale ee kiridhitka saddexaad ee sayniska.

# Sayniska

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga.*

## Sayniska 6A iyo 6B

**Koodhadhka Koorsada:** MSC3007, MSC3105

**Fasalada:** 6

**Muddada:** Labo simistar

Sayniska fasalka lixaad waxa uu diirada saaraa sagaal cutub-sheeko oo ku bilowda iyagoo ardayda ku hawlaya ifafaale hal-xiraale, oo sayniska khuseeya ama mas'alo injineerin. Ardayda waxay isku hawlaan mowduucyada sayniska iyadoo loo marayo dhaqamada sayniska dhabta ah oo ay ku jiraan baaritaan, dood, iyo sharraxaad. Ardayda waxay dhisaan barashada aasaasiga ah ee fikradaha sayniska ee asaasiga ah waxayna cilmigan ku dabaqaan labo cutub oo naqshadaynta injineerinka ah. Cutubyada waxay diiradda saaraan habdhisyada iyo unugyada jirka oo ay ku jiraan adeegsiga naqshadaynta injineerinka; tamarta kulaylka iyo dhaqdhaqaaqa molkiyuulka, doorsoomayaasha saameeya qaababka cimilada; saameynta isbeddelka cimilada iyo doorka aadanuhu ku leeyahay isbeddeladaan oo diirada lagu saarayo hawl naqshadaynta injineerinka ah; iyo nidaamyada Dhulka-Dayaxa-Cadceedda.

## Sayniska 7A iyo 7B

**Koodhadhka Koorsada:** MSC3038, MSC3108

**Fasalada:** 7

**Muddada:** Labo simistar

Sayniska fasalka toddobaad wuxuu horumarka waxbarashada ardayda ku taageeraa sagaal cutub-sheeko oo ku qotoma ifafaale hal-xiraale, oo sayniska khuseeya ama mas'alooyin injineerin. Ardayda waxay isku hawlaan mowduucyada sayniska iyadoo loo marayo dhaqamada sayniska dhabta ah oo ay ku jiraan baaritaan, dood, iyo sharraxaad. Ardayda waxay sii wadaan dhisida fikradaha sayniska ee asaasiga ah iyo ku dabaqidda aqoonta ee naqshadaynta injineernimada. Cutubyada waxay diiradda saaraan dhaqdhaqaaqa saxanka iyo naqshadaynta nidaamka digniinta sunaamida; iyagoo sharraxaya wareegga dhagaxa; isbeddelka wejiga iyo naqshadaynta agabka wax lagu dhex koriyo oo la qaadi karo oo qiimo jaban; ilaalinta maatarka iyo dib u habeynta atamka ee falgallada kiimikada; sida bulshada noolayaashu ay isugu saameeyaan nidaamka deegaanka; iyo dhaqdhaqaaqa kaarboonka iyada oo loo marayo nidaamyada nool iyo kuwa aan noolayn.

## Sayniska 8A iyo 8B

**Koodhadhka Koorsada:** MSC3042, MSC3109

**Fasalada:** 8

**Muddada:** Labo simistar

Sayniska fasalka sideedaad wuxuu horumarka waxbarashada ardayda ku taageeraa sagaal cutub-sheeko oo ku qotoma ifafaalaha sayniska khuseeya ama mas'alooyin injineerin. Ardayda waxay sii wadaan ku lug yeelashada dhaqamada sayniska ee dhabta ah iyo dhisida fikradaha sayniska ee asaasiga ah iyo ku dabaqidda aqoonta ee naqshadaynta injineernimada. Cutubyada waxay diiradda saaraan xiriirka u dhexeeya xoogga, keynaanta, iyo cufka xilliga is-hardiyada waxayna naqshadeeyaan sanduuqa geynta sahayda gurmadka degdega ah; xiriirka ka dhexeeya xoogga birlabeed, tamar socod iyo tamar kayd; isdhexgalka mowjadaha iftiinka iyo maatarka; kala duwanaanshaha hidde-sidaha iyo dhaxalka; hannaanka xulashada dabiiciga ah iyo naqshadaynta daawooyinka ka hortagga duumada ee yareeya iska caabbinta daawada; iyo isbeddelada sinjiyada waqti ka dib.

# Cilmiga Bulshada

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12

| Fasalka | Koorsooyinka |
|---|---|
| FASALKA 6aad | Taariikhda Adduunka 6 |
| FASALKA 7aad | Taariikhda Gobolka WA 7 |
| FASALKA 8aad | Taariikhda Mareykanka ee Daraasaadka Dadka Madow 8, Taariikhda Mareykanka ee Filibiinka Mareykanka 8 |
| FASALKA 9aad | Taariikhda Adduunka 1 iyo Taariikhda Adduunka 2 Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Adduunka 2, Taariikhda Adduunka AP 1, -ama- Juqraafiga Aadanaha AP A |
| FASALKA 10aad | Taariikhda Adduunka 3 Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Adduunka 3 Taariikhda Adduunka AP 2 Juqraafiga Aadanaha AP B, Adduunka Daraasaadka Dadka Madow 3 -ama- LGBTQIA Taariikhda Adduunka 3 |
| FASALKA 11aad | Taariikhda Mareykanka, Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Mareykanka, Taariikhda Mareykanka IB, Taariikhda Mareykanka AP, CIHS AES 151, CIHS 147 & 148, Daraasaadka Afrikaanka Maraykanka AP, Daraasaadka Dadka Madow -ama- Taariikhda Mareykanka Filipinx iyo Latinx |
| FASALKA 12aad | Dhaqaalaha Rayidka Dawlada Maraykanka, IB Qarniga 20aad -ama- Dowladda Mareykanka & Siyaasadda AP |

# Cilmiga Bulshada

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga.*

*Laga bilaabo fasalka toddobaad ilaa fasalka 12aad, ardayda Gobolka Washington oo dhan waxaa looga baahan yahay in ay qaataan hal simistar oo taariikhda gobolka Washington ah.*

## Taariikhda Adduunka 6A iyo 6B

**Koodhadhka Koorsada:** MSS7451, MSS7452

**Fasalada:** 6

**Muddada:** Labo simistar

Taariikhda Adduunka 6A iyo 6B waa koorso sanad dhan ah oo xoojisa fahamka ardayda ee Dhulka iyo dadkiisa iyada oo loo marayo barashada taariikhda, juquraafiga, siyaasadaha, dhaqanka, iyo hababka dhaqaalaha. Ardaydu waxay sahmiyaan gobolada waawayn ee dunida waxayna u kuurgalaan ilbaxnimadi hore, iyagoo falanqaynaya soo bixidoodi iyo burburkoodi iyagoo tixgelinayo isdhexgalka dhaqameed. Koorsadu waxay dabooshaa taariikhda ilaa ku dhawaad 1450CE. Ardayda waxay horumarin doonaan xirfadaha qariiradda, baran doonaan sida taariikhda ay u dhisaan khuburada dhulka iyo taariikhyahanada, waxayna fahmi doonaan muhiimada ilaha koowaad iyo labaad, laga bilaabo kacaankii beeraha iyo ilbaxnimada webiyada.

## Taariikhda Gobolka Washington 7A iyo 7B

**Koodhadhka Koorsada:** MSS9045, MSS9046

**Fasalada:** 7

**Muddada:** Labo simistar

Taariikhda Gobolka Washington 7A iyo 7B waa koorso sanad dhan ah oo sahmisa taariikhaha qabaliga iyo gumaysiga ee Washington, diiradda saaraya mas'uuliyadaha rayid iyo bulsho ee mustaqbalka. Koorsadu waxay ku bilaabantaa shucuubtii ugu horreysay dhulka, iyadoo u kuurgalaysa dhulalka qabiileed iyo isku dheelitirnaanta u dhaxaysa qiyamyada dhulka ee dadka asaliga ah iyo kuwa gumaysiga. Ardaydu waxay bartaan haajiritaanka, cadaalada bulshada, magaalaynta, iyo isdhexgalka deegaanka si ay u horumariyaan wakaalada iyo fahamka rayidka, dhaqaalaha, juqraafiga, iyo taariikhda. Waxay xoojin doonaan xirfadaha cilmiga bulshada, iyagoo falanqaynaya dhacdooyinka taariikheed iyo kuwa hadda, iyagoo samaynaya cilmi-baaris wax isweydiin ku salaysan, qiimeynaya ilaha lagu kalsoonaan karo iyo kuwa dhinaca ka raran, oona fahmaya aragtiyo kala duwan oo ku saabsan arrimaha dadweynaha.

## Taariikhda Marekanka 8A iyo 8B

**Koodhadhka Koorsada:** MSS7459, MSS7460

**Fasalada:** 8

**Muddada:** Labo simistar

Taariikhda Maraykanka, ardayda waxay faham qoto dheer, oo cad ka helaan fikradaha cilmiga bulshada marka loo eego waaqaca taariikhda iyo dawladda Maraykanka laga soo bilaabo 1776 ilaa 1877. Koorsadu waxay dabooshaa fikrado muhiim ah, arrimo, iyo dhacdooyin laga soo bilaabo qaabaynta Dastuurka ilaa Dib-u-dhiska. Ka dib u kuurgalka aasaaskii Mareykanka iyo Dastuurka, ardaydu waxay baaraan horumarka siyaasadda, bulshada, dhaqanka, iyo dhaqaalaha ee qaranka. Sahmintani waxay kor u qaadaysaa fahamkooda fikradeed ee cilmiga rayidka, juqraafiga, iyo dhaqaalaha, iyagoo kobcinaya hab fikirka muhiimka ah iyo fahanka dhammeystiran ee aasaaska taariikheed iyo dawladeed ee Maraykanka.

# Bandhiga Fanka & Farshaxanka

## Taxanaha Koorsada & Tusaalooyinka Fasalada 6-12

FASALKA 6aad

FASALKA 7aad

FASALKA 8aad

Hal simistar oo ah farshaxanka muuqda, bandhiga fanka, ama fanka warbaahinta sanad kasta fasalada 6-8.

FASALKA 9aad

FASALKA 10aad

FASALKA 11aad

FASALKA 12aad

2 kiridhit oo ah Bandhiga Fanka & Farshaxanka, oo mid kamid ah uu aadi karo xaga ardayga ee *Diyaargarowga Shakhsi Ahaaneed* [c].

Ugu yaraan, ardaygu waxa uu ubaahan yahay 1 kiridhit oo fanka ah.

[c] *Si aad u hesho qeexitaanka Diyaargarowga Shakhsi Ahaaneed, fadlan ka eeg shuruudaha qalin jabinta ee kujira webseedka Guddiga Waxbarashada Gobolka:* https://www.sbe.wa.gov/our-work/graduation-requirements

### Tusaalooyinka:

***Arday raba inuu raaco dhaqanka fan gaar ah (tusaale muusig):***

- Fasalka 6aad: Hobolada Hordhaca
- Fasalka 7aad: Hobolada Dhexe
- Fasalka 8aad: Hobolada Bandhiga
- Fasalka 9aad: Hobolada Xargaha Kabanka
- Fasalka 10aad: Hobolada Bandhiga
- Fasalka 11aad: Hobolada Qalabka Muusiga
- Fasalka 12aad: Hobolada Kooxda ah

***Ardayga raba inuu sahmiyo dhaqamada fanka oo badan:***

- Fasalka 6aad: Bilowga Farshaxanka Muuqda
- Fasalka 7aad: Khibrada Muusiga
- Fasalka 8aad: Bilowga Tiyaatarka
- Fasalka 9aad: Bilowga Sawirida & Riinjiyeynta
- Fasalka 10aad: Bilowga Tiyaatarka/Sare
- Fasalka 11aad: Laabka Gitaarka 1
- Fasalka 12aad: Bilawga Sawir Qaadista

# Bandhiga Fanka & Farshaxanka

*Fadlan la soco, boggagani kaliya waxa ay ku daraan saambalka koorsooyinka laga bixiyo Bandhiga Fanka & Farshaxanka ee loogu talagalay muusiga iyo farshaxanka muuqda. Fadlan la xiriir iskuulkaaga si aad u ogaato koorsooyinka ay bixiyaan.*

*Waajibaadka fanka dugsiga dhexe ee gobolka waxa uu uga baahan yahay degmooyinka in ay xaqiijiyaan ardayda oo dhan in ay qaataan ugu yaraan hal simistar oo fanka muuqda ama bandhigga ah ee fasallada 6, 7, iyo 8.*

## Muusiga

### Hobolada Horudhaca

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8509, MFA8510

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Hal sano ama labo simistar

Ku soo dhawoow Horudhaca Kooxda Muusiga! Koorsadani waxaa loogu talagalay ardayda rabta in ay bartaan qalabka muusiga ee turumbada alwaaxa, turumbada birta, ama qalabka la garaaco sida flute, clarinet, turumbada, trombone, durbaanka, iyo qaar kaloo badan. Kaalay oo ku biir bulsho soo dhaweyn leh oo ay ka go'an tahay dhisidda xiriiro waara halkaas oo ardayda oo dhami guulaystaan. Waxaad baran doontaa farsamada qalabka, muusikaystinimada, waxaadna samayn doontaa qaabab badan oo muusig ah. Ma jirto khibrad hore oo loo baahan yahay. Ardayda oo dhan waa lagu soo dhaweynayaa.

### Hobolada Qalabka Muusiga La Garaaco

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8500

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Hal sano ama labo simistar

Sahmi fursadaha laxanka dunida ee Qalabka Muusiga La Garaaco! Tani waa bulsho soo dhaweyn leh oo loogu talagalay ardayda danaynaysa barashada qalabka muusiga ee codka raaca iyo kan aan codka raacin oo ku jiri kara durbaanka wayn, durbaanka xargaha leh, durbaanka birta, iyo qaar kaloo badan. Baro farsamooyinka loo garaaco oo xirfadaha muusikaystinimada ku dhis samaynta muusig kala duwan oo ka kala socda dhaqamo iyo waayo kala duwan – waagi hore iyo hadda – adigoo cilaaqaad waara la yeelanaya dadka kale. Ma jirto khibrad hore oo loo baahan yahay. Ardayda oo dhan waa lagu soo dhaweynayaa.

### Hobolada Dhexe

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8438, MFA8439

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ku Soo Dhawoow Hobolada Dhexe! Koorsadan sanadka oo dhan ah waxaa loogu talagalay ardayda khibrad sanado badan ah u leh qalabka violin, viola, cello, ama string bass.  Qayb ka noqo bulsho soo dhaweyn leh oo cilaaqaad waara ku dhis wax ku soo bandhigista riwaaayadaha dugsiyada iyo u safridda xafladaha gobolka. Sii wad inaad ballaariso farsamadaada qalabka, muusikaystinimada, oo samee qaabab badan oo muusig ah.

### Hobolada Riwaayadaha

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8409, MFA8410

**Fasalada:** 7-8

**Muddada:** Labo simistar

Qaabkaaga heesidda ku ballaari bulsho kuu jiibisa oo taageero leh! Kooxda Heesaha waa koorso horumarsan, oo sanad ah oo loogu talagalay ardayda leh sannado badan oo waayo-aragnimo heeseed ah. Ardaydu waxay sii wadaan inay horumariyaan xirfadahooda codeed iyo muusiknimo iyagoo soo bandhigayo muusig soojiidasho leh oo ka kala socdo noocyo, dhaqamo, iyo qaabab kala duwan, iyagoo isla markaana dadka kale cilaaqaad kula dhisaya ka heesidda riwaayadaha dugsiga iyo bulshada una safraya xafladaha gobolka.

### Khibrada Muusiga

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8400

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Hal simistar

Ogow xiriirka aad la leedahay muusigga! Experience Music waa koorso kuu bilaabaysa dhaqamo iyo qaabab kala duwan iyadoo loo marayo muusig-samayn iyo/ama farsamada muusigga. La shaqee dad kale si aad u abuurto oo aad u shiddo muusigga asalka ah iyo/ama muusig ka socdo bulshooyin iyo dhaqamo kala duwan adigoo intaas un dhisaya fahamkaaga fikradaha, xirfadaha, iyo farsamooyinka muusiga. Ma jirto khibrad hore oo loo baahan yahay. Ardayda oo dhan waa lagu soo dhaweynayaa.

## Tiyaatarka

### Tiyaatarka Bilow iyo Heer Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8517, MFA8518

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Hal simistar

Ku Soo DhawoowTiyaatarka Bilow iyo Heer Horumarsan! Tiyaatarka Bilowga waxaa loogu talagalay ardayda danaynaysa jilitaanka iyo bandhigga oo qeyb ka ah bulsho taageero leh iyagoo u marayo waxqabadyo madadaalo iyo hal-abuur leh. Fagaara ka hadlidda, mashaakil xallinta hal-abuurka leh, iyo iskaashiga ayaa lagu sahmiyaa leyliyo codeed iyo dhaqdhaqaaq, hagaajin, qaab-dhismeed sheeko, abuurista jile, daraasadda goobta, gabayada, iyo riwaayad qorista. Waxaad sahmin doontaa aragtiyo iyo codad kala duwan adigoo adeegsanaya xalqooyin iyo qoraallo laga soo qaatay dhaqamo masrax oo kala duwan – kuwi hore iyo kuwa hadda. Tiyaatarka Horumarsan wuxuu kor u qaadayaa xirfadahaaga jilista iyo bandhigista adigoo dad kale kala shaqaynayo inaad jisho oo aad soo bandhigto riwaayado, qoraalo, keli isla hadal, iyo shaqo lagu abuuray fasalka. Diirad saarista gaarka ah waxaa ka mid noqon kara hababka jilniinka horumarsan, dagaalka masraxa, u diyaargarowga is-tijaabinta, iyo sida loo bixiyo loona helo jawaab-celin. Ardayda oo dhan waa lagu soo dhaweynayaa.

### Soo Saarka Tiyaatarka

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8584

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Hal simistar

Ma doonaysaa in aad soo bandhigto bandhig? Soo Saarka Tiyaatarka waxaad qeyb ka tahay bulsho taageero leh si ay u soo saaraan una soo bandhigaan riwaayad, muusik, ama bandhig lagu abuuray wax u habaynta daawadayaasha dadweynaha. Wax kusoo bandhiga masraxa kuna shaqee masraxa dambe. Waxaad sidoo kale fursad u heli doontaa in aad ku takhasusto dhinacyada farsamooyinka sida qaab-dhismeedyada, qalabka, ama lebiska masraxa. Ardayda oo dhan waa lagu soo dhaweynayaa.

### Tiyaatarka Farsamada

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8601

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Hal simistar

Ma jeceshahay in aad waxyaabo dhisto oo aad mushkilad xalliso? Tiyaatarka Farsamada waa fasal wada-shaqayn leh, oo wax soosaar lagu hago oo ku siinaya horudhaca naqshadaynta tiyaatarka iyo dhismaha. Waxaad ka shaqayn kartaa qaab-dhismeedyada, lebiska, qalabka, iftiiminta, codka, curinta riyaadaha, timaha, waxyaabaha la isku qurxiyo, iyo xayaysiinta, oo dhammaantood loo adeegsan doono bandhig ay dad toos u daawanayaan. Ardayda oo dhan waa lagu soo dhaweynayaa.

## Farshaxanka Muuqda

### Farshaxanka Muuqda Bilow iyo Heer Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8519, MFA8520

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Hal simistar

Ku Soo Dhawoow Farshaxanka Muuqda Bilow iyo Heer Horumarsan! Farshaxanka Muuqda ee Bilowga ah wuxuu kicinayaa fikirkaaga adigoo sahminayo kuna tijaabinayo wax sawirid, riinjiyayn, sanam samayn, iyo qaar kaloo badan oo ku samaynaya bulsho taageero leh oo ah bartayaal hal-abuur leh dhexdooda. Muuji, xus, oo ka tarjun aragtidaada gaarka ah, fikradaha, dhaqanka, iyo shucuurta adigoo kusoo bandhigaya waxqabadyo shakhsiyeed iyo kooxeed adigoo isla markaana isticmaalaya Qeybaha Farshaxanka iyo Mabaadii'da Naqshadaynta. Farshaxanka Muuqda ee Horumarsan wuxuu kobcin doonaa hal-abuurkaaga iyo xirfadahaaga farshaxan adigoo abuuraya waxqabadyo 2D iyo 3D ah oo ku lug yeelan kara wax sawiridda, riinjiyaynta, khad wax ku daabicidda, isu keenista farshaxan kala duwan, dhoobada, iyo warqad wax ka suuraynta. Ardayda oo dhan waa lagu soo dhaweynayaa.

### Dhoobada Bilawga iyo Heerka Horumarsan

**Koodhadhka Koorsada:** MFA8403, MFA8404

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Hal simistar

Ku Soo Dhawoow Dhoobada Bilow iyo Heer Horumarsan! Dhoobada Bilowga ah, waxaad abuuri doontaa noocyo kala duwan oo waxqabadyo ah adigoo isticmaalaya farsamooyinka gacanta ee dhismaha sida faro ku samaynta dhoobada, dhuudhuubista, dhejiska, qaabaynta, iyo suurtogalnimada sida dhoobada loogu "tuuro" giraangiraha dheriga. Tijaabi siyaabo kala duwan oo loo midabeeyo loona xardho hawlahaaga oo ay ku jiri karaan koobabka, saxamada, dhoobabka ubaxyada la suro, kirliyada dhoobka ah, qaadooyinka, bahalaha dhoobka ah, iyo qaar kaloo badan. Kala shaqee kuwa kale inta aad maamulayso istuudiyaha oo aad xannaanaynayso agabka, aaladaha, iyo qalabka. Dhoobada Horumarsan waxaad ballaarin doontaa xirfadahaas adigoo khibradahaaga iyo aqoontaada u isticmaalaya in aad ku maamuusto oo aad ku gudbiso fikradahaaga, aragtidaada gaarka ah, iyo dhaqanka adigoo adeegsanaya farshaxankaaga. Ardayda oo dhan waa lagu soo dhaweynayaa.

# Luuqadaha Adduunka*

## Taxanaha Koorsada Lagu Taliyey ee Fasalada 6-12

FASALKA 6aad
FASALKA 7aad
FASALKA 8aad

Luuqadaha Adduunka 1A iyo 1B
Luuqadaha Adduunka 2A iyo 2B

FASALKA 9aad
FASALKA 10aad
FASALKA 11aad
FASALKA 12aad

Luuqada Adduunka 1A iyo 1B
Luuqada Adduunka 2A iyo 2B
Luuqada Adduunka 3A iyo 3B (Waa ikhtiyaari)
Luuqada Adduunka 4A & 4B (Waa ikhtiyaari)
IB Luuqada Adduunka 4A & 4B (Waa ikhtiyaari)
IB Luuqada Adduunka 5A & 5B (Waa ikhtiyaari)
AP Luuqada Adduunka 5A & 5B (Waa ikhtiyaari)
AP Suugaanta Isbaanishka (Waa Ikhtiyaari)
IB Luuqada Adduunka 6A & 6B (Waa ikhtiyaari)

*Dugsiyada dhexe ee SPS waxay caadi ahaan koorsooyinkaan u bixiyaan doorasho ahaan oo macnaheedu tahay in ardayda aanay qasab ku ahayn in ay fasaladaan ku qaataan dugsiyada dhexe.

# Luuqadaha Adduunka

*Fadlan la soco in boggagani kaliya ay ku jiraan koorsooyin qaar oo laga soo qaatay baaxadda lagu taliyey iyo taxanaha casharka aagan. Si aad u hesho liiska dhammeystiran ee koorsooyinka la heli karo, fadlan kala xiriir iskuulkaaga.*

## Af-Carabi 1

**Koodhadhka Koorsada:** SWL3471, SWL3473, HWL3470, HWL3472

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Carabiga waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Carabiga iyo Af-Carabiga Mareykanka.

## Af-Shiineeska 1

**Koodhadhka Koorsada:** SWL1277, SWL1278, HWL1277, HWL1278

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Shiineeska waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Shiineeska iyo Af-Shiineeska Mareykanka.

## Af-Shiineeska 2

**Koodhadhka Koorsada:** SWL3579, SWL3580, HWL3579, HWL3580

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxa ay ku dhismaan aasaaska luqadda Shiineeska waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay sii wadaan in ay sii horumariyaan awoodooda ay kula xiriirayaan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay sidoo kale bilaabaan inay horumariyaan akhris-tarjumidda iyo xirfadaha dhageysiga ee guud ahaan xaalado iyo mowduucyo kala duwan. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan mawduucyo ay kamid yihiin hawl maalmeedka, nashaadaadka bulshada, nashaadaadka kooxeed ee lagu celceliyo luqadda, muusiga, ciyaaraha iyo mowduucyo kale duwan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Shiineeska iyo Af-Shiineeska Mareykanka.

## Af-Shiineeska 3

**Koodhadhka Koorsada:** SWL3583, SWL3584, HWL3583, HWL3584

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardeydu waxay sii qoto dheereeyaan ku wada-xiriirkooda luqadda Shiineeska iyaga oo u maraya akhrinta, qorista, ku hadlidda iyo dhageysiga. Ardaydu waxa ay adeegsadaan qoraalo iyo xaalado kala duwan si ay ugu celceliyaan oo ay u dabaqaan luqadda Shiineeska. Ardaydu waxa ay muujiyaan ku wada-xiriirka mowduucyo badan oo kala duwan iyaga oo u maraya dood kooxeed, bandhigyo afka ah, akhrinta sheekooyinka gaagaaban iyo qorista sheekooyin asal ah. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Shiineeska iyo Af-Shiineeska Mareykanka, iyo sidoo kale dhacdooyinka hadda ee la xiriira caalamka looga hadlo Af-Shiineeska.

## Af-Faransiis 1

**Koodhadhka Koorsada:** SWL1273, SWL1274, HWL1273, HWL1274

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Faransiiska waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Faransiiska iyo Af-Faransiiska Mareykanka.

## Af-Faransiis 2

**Koodhadhka Koorsada:** SWL3522, SWL3523, HWL3522, HWL3523

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxa ay ku dhismaan aasaaska luqadda Faransiiska waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay sii wadaan in ay sii horumariyaan awoodooda ay kula xiriirayaan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay sidoo kale bilaabaan inay horumariyaan akhris-tarjumidda iyo xirfadaha dhageysiga ee guud ahaan xaalado iyo mowduucyo kala duwan. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan mawduucyo ay kamid yihiin hawl maalmeedka, nashaadaadka bulshada, nashaadaadka kooxeed ee lagu celceliyo luqadda, muusiga, ciyaaraha iyo mowduucyo kale duwan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Faransiiska iyo Af-Faransiiska Mareykanka.

## Af-Faransiis 3

**Koodhadhka Koorsada:** SWL3526, SWL3527, HWL3526, HWL3527

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardeydu waxay sii qoto dheereeyaan ku wada-xiriirkooda luqadda Faransiiska iyaga oo u maraya akhrinta, qorista, ku hadlidda iyo dhageysiga. Ardaydu waxa ay adeegsadaan qoraalo iyo xaalado kala duwan si ay ugu celceliyaan oo ay u dabaqaan luqadda Faransiiska. Ardaydu waxa ay muujiyaan ku wada-xiriirka mowduucyo badan oo kala duwan iyaga oo u maraya dood kooxeed, bandhigyo afka ah, akhrinta sheekooyinka gaagaaban iyo qorista sheekooyin asal ah. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Faransiiska iyo Af-Faransiiska Mareykanka, iyo sidoo kale dhacdooyinka hadda ee la xiriira caalamka looga hadlo Af-Faransiiska.

## Af-Jabaan 1

**Koodhadhka Koorsada:** SWL1275 SWL1276, HWL1275 HWL1276

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Jabaanka waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Jabaanka iyo Af-Jabaanka Mareykanka.

## Af-Jabaan 2

**Koodhadhka Koorsada:** SWL3541, SWL3542, HWL3541, HWL3542

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxa ay ku dhismaan aasaaska luqadda Jabaanka waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay sii wadaan in ay sii horumariyaan awoodooda ay kula xiriirayaan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay sidoo kale bilaabaan inay horumariyaan akhris-tarjumidda iyo xirfadaha dhageysiga ee guud ahaan xaalado iyo mowduucyo kala duwan. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan mawduucyo ay kamid yihiin hawl maalmeedka, nashaadaadka bulshada, nashaadaadka kooxeed ee lagu celceliyo luqadda, muusiga, ciyaaraha iyo mowduucyo kale duwan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Jabaanka iyo Af-Jabaanka Mareykanka.

## Af-Jabaan 3

**Koodhadhka Koorsada:** SWL3545, SWL3546, HWL3545, HWL3546

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardeydu waxay sii qoto dheereeyaan ku wada-xiriirkooda luqadda Jabaanka iyaga oo u maraya akhrinta, qorista, ku hadlidda iyo dhageysiga. Ardaydu waxa ay adeegsadaan qoraalo iyo xaalado kala duwan si ay ugu celceliyaan oo ay u dabaqaan luqadda Jabaanka. Ardaydu waxa ay muujiyaan ku wada-xiriirka mowduucyo badan oo kala duwan iyaga oo u maraya dood kooxeed, bandhigyo afka ah, akhrinta sheekooyinka gaagaaban iyo qorista sheekooyin asal ah. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Jabaanka iyo Af-Jabaanka Mareykanka, iyo sidoo kale dhacdooyinka hadda ee la xiriira caalamka looga hadlo Af-Jabaanka.

## Isbaanish 1

**Koodhadhka Koorsada:** SWL1279, SWL1280, HWL1279, HWL1280

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxaa la siiyaa horudhaca luqadda Isbaanishka waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay bilaabaan in ay wax kula xiriiraan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan wax ku saabsan mawduucyo ay kamid yihiin salaamaha, qeexitaanada, sheegista waqtiga, goobaha, iskuulka, qoyska, cuntada iyo saaxiibada, iyo hawlo badan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Isbaanishka iyo Af-Isbaanishka Mareykanka.

## Isbaanish 2

**Koodhadhka Koorsada:** SWL3560, SWL3561, HWL3560, HWL3561

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardayda waxa ay ku dhismaan aasaaska luqadda Isbaanishka waxa ayna bartaan luqad loo adeegsan karo wada sheekaysiga maalinlaha ah. Ardaydu waxa ay sii wadaan in ay sii horumariyaan awoodooda ay kula xiriirayaan qorista iyo ku hadlidda luqadda bartilmaameedka ah. Ardaydu waxa ay sidoo kale bilaabaan inay horumariyaan akhris-tarjumidda iyo xirfadaha dhageysiga ee guud ahaan xaalado iyo mowduucyo kala duwan. Ardaydu waxa ay ku xiriiraan mawduucyo ay kamid yihiin hawl maalmeedka, nashaadaadka bulshada, nashaadaadka kooxeed ee lagu celceliyo luqadda, muusiga, ciyaaraha iyo mowduucyo kale duwan. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Isbaanishka iyo Af-Isbaanishka Mareykanka.

## Isbaanish 3

**Koodhadhka Koorsada:** SWL3564, SWL3565, HWL3564, HWL3565

**Fasalada:** 6-8

**Muddada:** Labo simistar

Ardeydu waxay sii qoto dheereeyaan ku wada-xiriirkooda luqadda Isbaanishka iyaga oo u maraya akhrinta, qorista, ku hadlidda iyo dhageysiga. Ardaydu waxa ay adeegsadaan qoraalo iyo xaalado kala duwan si ay ugu celceliyaan oo ay u dabaqaan luqadda Isbaanishka. Ardaydu waxa ay muujiyaan ku wada-xiriirka mowduucyo badan oo kala duwan iyaga oo u maraya dood kooxeed, bandhigyo afka ah, akhrinta sheekooyinka gaagaaban iyo qorista sheekooyin asal ah. Ardaydu waxa ay ballaariyaan fahamkooda dhaqanka iyaga oo daraaseynaya wadamada ku hadla Af-Isbaanishka iyo Af-Isbaanishka Mareykanka, iyo sidoo kale dhacdooyinka hadda ee la xiriira caalamka looga hadlo Af-Isbaanishka.

***Farriin ku saabsan Koorsooyinka Sare iyo Koorsooyinka Luqada Dhaxalka:***

*Koorsooyin badan oo sare sida Dugsiga Caalamiga ah (IB), Meeleynta Sare (AP) iyo Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa ah (CIHS) ayaa lagu bixiyaa luqado kala duwan iyo iskuulo kala duwan. Intaa marka laga yimaado, koorsooyinka luqadda dhaxalka ayaa sidoo kale lagu bixiyaa luqado kala duwan. Ka hubi iskuulkaaga waxyaabaha laga bixiyo ee la heli karo.*

Fursadaha Waxbarasho iyo Shaqo ee Loo Wada Siman Yahay: Dugsiyada Dadweynaha Seattle, SPS, waxa ay bixiyaan Fursadaha Waxbarasho ee loo Wada Siman Yahay iyo Fursadaha Shaqo ee loo Wada Siman Yahay mana ku kala takooro wax barnaamijyo ah ama hawlo ah oo ku saleysan jinsiga; isirka; caqiidada; midabka; diinta; abtiriska; wadanka uu kasoo jeedo qofka; da'da; xaalada dhaqaale; nooca rabitaanka galmada, oo ay kujirto muujinta ama aqoonsiga jinsiga; uurka; xaaladda guurka; muuqaalka jirka; jiritaanka wax naafonimo dareen, maskax ama jireed; ka saarida halyeey sharaf leh ama xaalad militari; ama adeegsiga hage eey tababaran ama xayawaanka caawinta adeegga. SPS waxa uu sidoo kale bixiyaa helitaanka loo siman yahay ee Boy Scouts iyo kooxaha kale ee loogu talagalay dhalinyarada.

SPS waxa uu u hoggaansamaa dhammaan shuruucda iyo qawaaniinta gobolka iyo federaalka, oo ay ku jiraan laakiin aanay ku koobneyn: Ciwaanka IX ee Wax ka Beddelka Waxbarashada ee 1972; Ciwaanka VI Xeerka Xuquuqda Rayidka 1964; Qeybta 504 ee Sharciga dhaqancelinta ee 1973; Xeerka Ameerikaanka Naafada ah (ADA) ee 1990 iyo Xeerka Wax ka Beddelka ADA ee 2008; iyo Sharciga Washington ee Ka Dhanka ah Takoorka RCW 49.60. U hoggaansanaanta SPS waxaa kamid ah, laakiin aanay ku koobneyn dhammaan barnaamijyada degmada, koorsooyinka, iyo nashaadaadka, oo ay ku jiraan nashaadaadyo manhajka ka baxsan, adeegyada, iyo gelitaanka xarumaha.